



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI Lr. 19

TAARIKH: 27/06/2016

ANSIXINTA SHARCIGA AXSAABTA SIYAASADDA DALKA

MADAXWAYNAHA J.F.S

- MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S
- MARKUU ARKAY:** Qodobada 16aad iyo 22aad , Faqraddiisa 1aad (a) iyo (b), Faqradda 2 iyo 3aad ee Dastuurka J.F.S
- MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoonka Golaha Shacabka Lr. 1360/3/1/9/16 ee 06/06/2016 kuna saabsan Ansixinta Sharciga Axsaabta Siyaasadda Dalka
- MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in uu yeesho Dalka axsaab siyaasadeed si loo dhaqangeliyo hanaan dimoqaraadi ah iyo Dowlad-wanaag ay Ummadda ku qanacsan tahay.

Waxuu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo, waxaa la oggolaaday ansaxinta Golaha Shacaba ee Sharciga Axsaabta Siyaasadda Dalka.

Qodobka 3aad

Waxuu Xeerkaan Dhaqangelayaal isla maalinta uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo waxaa la baabi'yay sharci iyo xeer kasto ee ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Muqdisho 27/06/2016



Madaxwaynaha J. F.S
Xasan Sheekh Maxamuud



Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Ref: ١٣٥٠ /٣/١/٩/١٦ الرقم:

Mogadishu, 6th June 2016 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka.
Muqdisho.

Og: Garyaqanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Guddiga Arrimaha Gudaha, Amniga iyo Maamulada Gobollada
L/H. Golaha Shacabka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

Ujeeddo: Ansixinta Sharciga Xisbiyadda Siyaasadda

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kugu wargelinaya inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Xisbiyadda Siyaasadda oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 8aad ee Fadhligiisii 14aad ee 6^{da} Juun 2016 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 149 (Boqol Afartan iyo Sagaal) Xildhibaan.
- Xildhibaan diidey: 1 (Hal) Xildhibaan.
- Xildhibaan ka aamustay 3 (Saddex) Xildhibaan.

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



MJ/AM

Tell: +252 612224442 / +252 615577472


E-mail. speaker@sfp.so

Website: www.sfp.so

ANSIXINTA SHARCIGA XISBIYADDA SIYAASADDA.

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS


Tirada Xubnaha Codeysay 153: Oggol (149) Diidmo (1) ka aamustay (3)



Taariikh: 6th June 2016

Saxiix: M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS




Taariikh: 6th June 2016

Saxiix: M.ne Jeylaani Nuur likar

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS

Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad

Taariikh: 6th June 2016





JAMHUURIYADDA FEDERAAKA SOOMAALIYA
Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulada Gobollada & Amniga
Qaranka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Tr.06.06.2016

Ref: GAGMGA /1025/2016

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka ee JFS = Muqdisho

Ujeeddo: Soo Gudbin Aqrinta 3aad ee Sharciga Xisbiyadda Siyaasadda

Mudane Guddoomiyye,

Mudaneyaal,


Sharciga Xisbiyadda Siyaasadda oo akhrintiisi 2aad maray marka ay ahayd taariikhdu **16/02/ 2016** Guddiga Arrimaha Gudaha Iyo Aminga waxa uu Xubnaha Golaha Usoo gudbinayaa Aqrinta 3aad ee Sharciga Xisbiyadda Siyaasadda.

Mudane Guddoomiyye iyo Mudaneyaal,

sharcigan oo aan wax isbadal ah lagu samaynin ka dib akhrintii 2aad.

Waxa aan la tashi la yeelanay Guddigii Qalin horaadka sharcigan lahaaa iyo Madaxda Xisbiyadda Siyaasadda Hadda jira oo aan kulan la qaadanay Tariikhda marka ay ahayd **01/06/2016**.

La tashigaas ka dib waxa guddiga usoo baxay in sharcigan uusan u baahnayn in wax ka badal lagu sameeyo anaga oo tixgelinaynay Doodi Xildhibaanada ee u badnayd in xisbiyadda Siyaasadda Lasoo koobo ama la xadido. Anaga oo maanka




ku hayno sharcigaan iyo shuruudaha uu wato oo ay adag tahay in ay soo baxaan xisbiyyo isbarbaryaca waxaan go'aansanay in laga maarmo in la xadido xisbiyadda Siyaasadda.

Sidaa darteed xildhibanada sharafta leh waxaa ka codsanaynaa in akhrintaan Saddexaad ka dib wixii talo iyo tusaalooyin ah ay lasoo wadaagn Guddiga Arrimaha Gudaha iyo Aminga Qaranka inta uusan sharciga Gudbin.

Gunaanadka
Mudanayaal,

Waxaan si xushmad ku dheehan tahay idinkaga codsanayaa in sharcigaan la meelmariyo Si Dalkeenu ugu baxo Nidaamka Awood qaybsiga ee ku dhisan Hab-beeledka, uguna gudbo nidaamka Dimoquradeynta xisbiyada badan.

Mahadsanidiin.

Xil. Daahir Amiin Jeesoow 
Guddoomiye ku-xigeen Guddiga Arrimaha Gudaha iyo Amniga Gudaha



Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Secretary General

Ref: XG/1143 /02/2016

Date: 14/02/2016

Ku: Guddomiyaha Guddiga Arrimaha Gudaha Ee Golaha Shacabka
=Muqdisho=

Og: Guddomiyaha Golaha Shacabka
=Muqdisho=

Ujeeddo: Soo Gudbin "HindiseSharchiyeedka Lagu Dhisayo Asxaabta Siyaasadeed Dalka".

Mudane Guddomiye,

Anigoo fulinaayo amarka Guddomiyaha Golaha Shacabka Wuxaan halkaan kugu soo lifaaqay **Hindise Sharchiyeedka Lagu Dhisayo Asxaabta Siyaasadeed Ee Dalka** oo xukuumadda u soo gudbisay Xoghaynta Guud Taarikhdu markey aheyd 11/02/2016, Hindise sharchiyeedkaan oo qabyo qoraalkiisii Baarlamaanku u gudbiyay Xukuumadda 01-June-2015.

Sidaas awgeed waxaa la idinka codsanayaa inaad u soo gudbisaan Golaha Shacabka warbixintiina si uu golaha shacabku uga guto waajibaadkiisa.

Wada Shaqeyn Wacan,

Xaaji Cabdikariim Xaaji Cabdi Buux
Xoghayaha Guud Ee Golaha Shacabka.



Tixraac: XRW/0000-32. /02/2016

Taariikh: 11/02/2016

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka JFS

=Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=

Ujeeddo:- Soo Gudbin Hindise Sharchiyeedka Lagu Dhisayo
Axsaabta Siyasadeed ee Dalka

Mudane Guddoomiye,

Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay SHGW.00.55.02.16 ee 11/02/2016, kuna saabsanaa ansixinta "Hindise Sharchiyeedka Lagu Dhisayo Axsaabta Siyasadeed ee Dalka" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa 'Hindise Sharchiyeedka Lagu Dhisayo Axsaabta Siyasadeed ee Dalka' si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah; waxaan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta "Hindise Sharchiyeedka ujeeddada sare ku xusan" maadaama baahi weyn loo qabo dhaqan-gelintiisa.

Mudane Cumar C. C. Sharmaarke
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



BAARLAMAANKA FEDERAALKA	SOOMALIYEED
XAFIISKA GUDDOOMIYA	GELID/RECEIVED
TAR: 13/2/2016	
TIX: 937	
SIXIX: 13M00001	

13:35 pm



Tixraac: XRW/0004/2016/02/2016

Taariikh: 11/02/2016

Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS =Muqdisho=

Og: Guddoonka Golaha Shacabka JFS =Muqdisho=

Og Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

Ujeeddo:- Go'aan Gole- "Ansixinta Hindise Sharchiyeedka
Lagu Dhisayo Axsabta Siyaasadeed ee Dalka"

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS,

Markuu arkay: Qod. 99^{aad} (a), (b) iyo (c) ee Dastuurka JFS.

Markuu arkay: Qod. 100^{aad} (a) iyo (d) ee Dastuurka JFS.

Markuu arkay: Soo-jeedinta Wasiirka Arimaha Gudaha iyo Federaalka.

Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay
SHGW.00.55.02.16 ee 11/02/2016, kuna saabsanaa 'Ansixinta
Hindise Sharchiyeedka Lagu Dhisayo Axsabta Siyaasadeed ee
Dalka', oo Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo gudbinta "Hindise Sharchiyeedka Lagu
Dhisayo Axsabta Siyaasadeed ee Dalka"

Wuxuu meel-mariyey:

Qodobka 1^{aad}

Go'aanka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay SHGW.00.55.02.16 ee 11/02/2016, kuna
saabsanaa 'Ansixinta Hindise Sharchiyeedka Lagu Dhisayo Axsabta Siyaasadeed ee Dalka', oo
Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Qodobka 2^{aad}

In deg deg Golaha Shacabka loogu gudbiyo "Hindise Sharchiyeedka Lagu Dhisayo
Axsabta Siyaasadeed ee Dalka" ay uga gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah.

Mudane Cumar C. C. Sharmane
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS





Federal Republic of Somalia
Federal Government
Ministry of Interior & Federal Affairs
Office of the Minister

Ref: WAG&F/XW/2/0299/16

Date: February 10, 2016

Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda FS

"Muqdisho"

Ujeeddo:- Soo Gudbin Hindise Sharchiyeedka Xisbiyada Siyaasadda.

Mudane Ra'iisul Wasaare,

Salaan kadib, waxaan halkaan si xushmad iyo qadarin leh kuugu soo gudbinaynaa Hindise Sharchiyeedka Xisbiyada Siyaasadda oo horay Guddi gaar ah ugu saaray Guddoomiyaha Golaha Baarlamaanka JFS, guddigaas oo ka koobnaa 15 xubnood oo ka kala socday Hay'adaha Sharci dejinta iyo Fulinta, waxayna kala ahaayeen 12 Xildhibaan, 1 xubin Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, 1 xubin Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka iyo 1 xubin oo Wasaaradda Dastuurka ah taariikhdu markay ahayd 20/05/2014, ayadoo Wasaaradda dib loogu soo celiyey Hindise Sharchiyeedkan taariikhdu markay ahayd 1 June 2015 si loo soo dhameystiro wixii ka dhiman.

Haddaba, Mudane Ra'iisul Wasaare, annagoo ka duuleyna siyaasadda Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka wada tashi la sameeysay dhammaan Dowlad Goboleedyada, Ururada Siyaasada, bulshada qeybaheeda kala duwan sida Culuma-udiinka, Ururada Bulshada, Abwaanada, Haweenka iyo Dhalinyarada taariikhdu markay ahayd 21-23 November 2015, wada tashigaas waxaa ka soo baxay tallooyin wax ku ooi ah oo aan doonayno in lagu daro Hindise Sharchiyeedkan.

Sidaas darteed, Mudane Ra'iisul Wasaare, waxaan codsanaynaa in fududeeyo anxisinta Hindise Sharchiyeedkan si waajibaadka Xukuumaddu u Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka u gudato.


Wada Shaqueen Wacan

Md. Xildh. Cabdiraxmaan Maxamed Xuseen
Wasiirka Wasaaradda



Address: Via-Tanzania, 888 Building, Mobile: +252-615600001 or Email: odowaa@gmail.com

Mogadishu-Somalia



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

SHARCIGA XISBIYADDA SIYAASADDA

Sharci Lr: _____ ee _____
Sharciga Xisbiyadda Siyaasadda

Sharcigan wuxuu qeexayaa diiwaangelinta, maalgelinta iyo dhammaan shuruucda lagu dhaqayo xisbiyada siyaasadda ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya

Qodobka 1aad: Fasiraad Qaar Ka Mid Ah Ereyada Sharcigan Ku Jira

Erayada ku jira sharcigan, haddaan si kale loo dhigin waxaa loola jeeda sida soo socota:

Laan: waxaa laga wadaa qayb ka mid ah xisbiga siyaasadeed ee uu ku leeyahay meel ka baxsan xaruntiisa.

Diiwaangeliyaha: waxaa loola jeedaa mas'uulka u xilsaaran Dhammaan arrimaha la xiriira xisbiyada siyaasadda.

Guddi: waxaa loo la jeedaa tiro dad ah oo loo xilsaaray howl gaar ah.

Isbahaysi: waxaa loo la jeedaa laba xisbi ama ka badan oo ku heshiiyay wada fulin barnaamij siyaasadeed oo muddeysan.

Iskutag: Waxaa loo la jeedaa laba xisbi ama ka badan oo midoobay si waafaqsan dastuurka qaranka, shuruucda iyo habraaca xisbiyada sayaasadeed.

Doorasho: waxaa loo la jeedaa u codeyn musharax siyaasadeed si uu u qabto xil siyaasadeed.

Maalgeliye xisbi siyaasadeed: Waxaa loo la jeedaa cid kasta oo hanta ugu deeqda xisbi siyaasadeed ama musharax si waafaqsan sharcigan.

Maalgelin: Waxaa loo la jeedaa maalgelinta xisbiyada siyaasadeed ama musharrax ee lagu xusay qodobada 24aad-25aad ee Sharcigan.

Qodobka 2aad: Xisbi Siyaasadeed

Xisbi siyaasadeedka dimoqraadiga ahi waa hay'ad ay ka wada muuqdaan qeybaha kala duwan ee bulshada lehna isla xisaabtan dhab ah, soo bandhigaysa qorsheyaal kala duwan oo siyaasadeed, musharraxiin ka qeybgaleysa doorashooyinka guud, kana qeybqaadaneysa dhismaha xukuumadda ama mid mucaarad ku ah.

Xisbi siyaasadeedku waa in uu:

1. Lahaadaa muuqaal qaran, matalaa ugu yaraan saddex meelood laba ka mid ah (2/3) gobollada dalka si waafaqsan qodobka 58aad oo hoggaankiisa iyo xubnihiisuba ku saleysan yihiin xuduudihii gobollada dalka ee jiray 1991ki.
2. Lahadaa gole fulin oo si dimoqoraadi ah loo soo doortay;
3. Ilaliyaa, ku dhaqmaa, dhiirrigeliyana midnimada qaranka.
4. U hoggaansamaa mabaadi'ida dimoqoraadiyada ee maamul wanaagga, horumariyaa ku dhaqanka dimoqoraadiyadda, iyadoo xisbiga dhaxdiisa laga qabanayo doorashooyin xor iyo xalaal ah oo joogta ah.

5. Xushmeeyaa xuquuqda dadka oo dhan in ay ka qeybqaataan hannaanka siyaasadeed oo ay ka mid yihiiin dadka laga tirada badan yahay iyo dadka la hayb sooco.
6. Xushmeeyaa, dhiirigaliyaa xuquuqul insaanka, xoriyadda as'aasiga ah iyo xaqsoorka sinnaanta jinsiga.
7. Horumariyaa ujeeddooyinka iyo mabaadi'ida dastuurka sida kumeel-gaarka ah ee soomaaliya iyo sarreyn ta sharciga.
8. U hoggaansamaa, dhowraana hab-dhaqanka xisbiyada siyaasadeed.
9. Lagu maammulaa Xisbiyada iyo ururada siyaasadeed ee dalka hab waafaqsan sharcigan oo aan ka horimanayn shareecada islaamka, dastuurka qaranka iyo shuruucda kale ee dalka u yaalla.

Xisbiyada siyaasadeed waa in aan: –

1. Lagu dhisin xagjirnimo, qabiil, lajjad, hayb, sinji, lab/dhaddig, goboleysi iyo in uusan abaabulin isnaceeb bulshada dhaxdeeda ah.
2. Isku hawlin, dhiirrigelin qalalaaso colaadeed, cabsigelin xubnaha xisbigisa, xubnaha bulshada iyo xubnaha ururo kale.
3. Loo oggolaan in ay yeeshaan ciidamo hubeysan iyo ururro kuwaas oo kale ah.
4. Ku lugyeelan qaadashada iyo bixinta nooc kasta oo laaluush iyo musuqmaasuq ah.
5. Loo isticmaalin nooc kasta oo hantida qaranka ah danaha gaarka ah ee la xiriira doorashooyinka sida uu dhigayo sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka.

Qodobka 3aad:

Xaqa ka-Qeyb-Galka Siyaasadda

Xisbiyada siyaasadeed waxaa lagu dhisayaa si waafaqsan sharcigan kana horimanayn dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka u yaala.

Muwaaddin kasta ee soomaali ah oo gaaray da'da sideed iyo tobani (18) sano, wuxuu si waafaqsan sharcigaan iyo dastuurka, ka qeybgeli karaa tartan doorasho oo loo gelayo jago ka mid ah jagooyinka xisbiga.

Muwaaddin kasta oo xubin ka ah xisbiga wuxuu u tartami karaa jago ka mid ah jagooyinka xisbiga ugu yaraan markuu xubin ka ahaa xisbiga muddo lix bilood ah ka hor maalinta doorashadu dhaceys.

Qodobka 4aad:

Diiwaan-Gilinta Ku- Meel- Gaarka ah

- a. Dad ama ururro isu tagay ma noqon karaan xisbi siyaasadeed haddii aaney u diiwaangashaneyn si waafaqsan sharcigan iyo dastuurka qodobkiisa 22-aad.
- b. Ururro ama dad isu tagay si ay u abuuraan xisbi siyaasadeed waxay codsan karaan diiwaangelin kumeel-gaar ah.

- c. Shahaadada Diiwaangelinta kumeel-gaarka ah waxaa codsadayaasha lagu siinaya 30 maalmood gudahood haddii ay soo buuxiyaan shuruudaha ku xusan qodobka 6-aad ee sharcigan.
- d. Xisbi siyaasadeed oo kumeel-gaar loo diiwaangeliyay, si waafaqsan qodobka 2aad ee sharcigan, wuxuu soo codsan karaa in la siyo diiwaangelin buuxda shan bilood gudahood (5) ka hor intaan doorashadu bilaaban.
- e. Xisbi siyaasadeed kasta ee buuxiya shuruudaha muddada ku xusan faqrada 4-aad ee qodobkan, diiwaangeliyuhu wuxuu ku soo saaraya muddo toddobo maalmood gudahood ah faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyada federaalka soomaaliya iyo ugu yaraan labo ka mid ah warbaahinta dalka, si loo hubiyo haddii uu jiro xisbi kale oo leh magaca, astaanta iyo midabka ka muuqda codsigan.
- f. Inta laga oggolaanayo ama laga diidayo codsiga xisbi horey loo siiyay diiwaangelin kumeel-gaar ah marka uu soo codsado diiwaangelin rasmi ah, wuxuu sii adeegsanayaa diiwaangelintii kumeel-gaarka aheyd.
- g. Xisbi siyaasadeed aan haysanin diiwaangelin rasmi ah kama qaybgeli karo doorashooyin.

Qodobka 5aad:

Maxaa Lagu Soo Qorayaan Codsga Diiwaangelinta.

- 1. Codsga diiwaangelinta kumeel-gaarka ah ee xisbi siyaasadeed waa in ay ka muuqdaan arrimaha soo socda:
 - a. Maxdar qoraalka kulankii ugu horeeyay oo ay yeeshen xubnaha xisbiga asaasay oo saxiiyan;
 - b. Magaca xisbiga siyaasadeed oo buuxa iyo isagoo lasoo gaabiyay haddii uu codsado xisbigu.
 - c. Lifaaq nuqul dastuurka xisbiga siyaasadeed sida ku xusan qeybta 9aad ee sharcigan;
 - d. Ballanqaad sugaya dhowrista iyo ku-dhaqanka sharcigan iyo hab-dhaqanka lagu xusay jadwalka koowaad ee isla sharcigan.
 - e. Qoraal caddeynaya habka xisbigu u xallinayo khilaafaadkiisa gudaha oo la waafajiyay jadwalka 8aad ee sharcigan.
 - f. Khidmada diiwaangelinta kumeel-gaarka ah oo ah lacag ah 10 malyan ShSo. Oo u dhiganta shan boqol (\$500).
 - g. Codsi ku qoran warqad leh astaanta rasmiga ee xisbiga.
- 2. Haddii diiwaangeliyihu arko in aan shuruuduhu buuxin wuxuu xisbiga qoraal ku siinaya shan iyo tobant maalmood (15) oo ka bilaabaneysa maalinta uu codsiga soo gudbiyo si ay u soo buuxiyaan shuruudaha ka dhiman.

Qodobka 6aad:

Diiwaangelinta Rasmiga Ah.

- a. Codsga diiwaangelinta rasmiga ah ee xisbiga waa inuu ahaadaa qoraal uu saxiixay guddoomiyaha xisbiga ama ciddu uu u wakiisho.

- b. Xisbi siyaasadeed si kumeel-gaar ah loo diiwaangeliyay, waxaa si rasmi ah loo diiwaangalin karaa markii: –
- c. Tirada xubnaha saxiiayaashiisa dhan yihii ugu yaraan toban kun qof (10,000) oo codbixiyeyaal ah kana diiwaangashan ugu yaraan sagaal ka mid ah 18kii gobol ee horay u jiray 1991-kii, taas oo waafaqsan qodobka 49aad, faq (1) ee dastuurka kumeel-gaar ah.
- d. Xubnaha lagu sheegay faq (a) ee qodobkan waa in ay ka muuqdaan gobollada, beelaha, isu dheellitirnaanta jinsiga, matalaada dadka laga tirada badan yahay iyo kooxaha la hayb sooco.
- e. Golaha fulinta ee xisbiga waa in ay ka muuqataa isku dheellitirnaanta gobollada, beelaha, jinsiga, dadka laga tirada badan yahay iyo kooxaha la hayb sooco si waafaqsan qodobka 11-aad ee dastuurka federaalka ah iyo Qodobka 4 (2) ee sharcigaan.
- f. Waa in la muujiyaa in xubnaha golaha fulinta in ay buuxiyeen mid la mid ah shuruudaha ku xusan qodobka 58 ee dastuurka kumeel-gaarka.
- g. Xisbiga siyaasadeed ama ururrada waa in aanay noqon kuwa ka soo horjeeda shareecada islaamka, sidoo kale waa inaysan adeegsan ereyo gaf iyo xadgudub ku ah xisbiyada kale iyo maammulladooda.
- h. Waa in uu u soo gudbiyaa xafiiska madaxa bannaan ee diiwaangeliyaha: -

Magacyada, cinwaannada, calaamaddaha gaarka ah ee qof lagu aqoonsan karo iyo xilliga xubin kasta ka mid noqotay xisbiga, Meesha ay ku yaallaan xafiiska dhexe iyo laamaha xisbiga, cinwaannadooda, talefoonnadooda iyo emaillada- lagala xiriiri karo, Baaqa guud iyo dastuurka xisbiga oo waafaqsan jadwallada 3 iyo 4 iyo xeer hoosaadka doorashooyinka iyo magacaabista xisbiga dhexdiisa.
- i. Waa in ay leeyihii nidaam dhammaystiran, faahfaahsan oo ay ku xalliyaan khilaafka xisbiga iyagoo tixraacaya kuna dhaqmaya jadwalka 8-aad ee sharcigan iyo xeerarka u degsan xisbiga gudhiisa.
- j. Waa Inuu bixiyo khidmadda diiwaangelinta lacag dhan 20 malyan oo ShSo oo u dhiganta kun (\$1000) oo uu qabtay xafiiska diiwaangeliyaha.
- k. Xisbiga buuxiya shuruudaha diiwaangelinta ee ku xusan faqradda 2-aad ee sharcigan 30 maalmood gudahood, diiwaangeliyuhu wuxuu ku siinayaa shahaado diiwaangelin rasmi ah, waxaana meesha ka baxeysa shahaadadii kumeel-gaarka aheyd ee hore loo siiyay.
- l. Qof aan ahayn muwaaddin Soomaaliyeed xubin kama noqon karo xilna kama qaban karo xisbi siyaasadeed oo Soomaali ah.

Qodobka 7aad:
Diidmo Diiwaangelin.

Diiwaan geliyuhu wuxuu diidi karaa codsiga diiwaangelinta xisbi siyaasadeed haddii:
 Magaca xisbiga ama isagoo la soo gaabiyay, calaamadda xisbigu la mid noqoto ama u ekaato mid xisbi kale hore loogu diiwaangeliyay.
 Magaciisa anshaxdarro ama xadgudub ka muuqdo.

Qodobka 8aad:
Shuruucda Iyo Xeerarka Xisbiga.

- a. Shuruucda iyo xeerarka xisbi siyaasadeed kasta waa inay waafaqsan yihiin arrimaha ku xusan jadwalka labaad (2-aad) ee sharcigan.
- b. Diiwaangeliyuuh wuxuu ogeysiis qoraal ah siinaya xisbiga inuu sixitaan ku sameeyo magaciisa, sharcigiisa ama/yo xeerkiiisa muddo soddon (30) maalmood gudahood ah, ka bilaabmaysa maalinta ogeysiiska la gaarsiiyay.
- c. Ogeysiiska lagu sheegay faqrada 2-aad ee qodobkan waa in xisbiga si gaar ah loogu caddeeyaa meelaha u baahan sixitaanka.
- d. Haddii xisbi tixgelin waayo ogeysiinta la siiyay si waafaqsan faq 2-aad ee isla qodobkan, diiwaangelinta xisbiga waa laga saaraya loomana oggalaanayo inuu la midoobo ama isbaheysi la yeesho xisbi ama xisbiyo kale.

Qodobka 9aad:
Isbaheysi Xisbiyo.

- a. Xisbiyo siyaasadeed, labo ama ka badan ayaa sameysan kara isbaheysi, waana inay siyyaan diiwaangeliyaha heshiiskooda oo qoraal ah.
- b. Heshiiska isbaheysiga la galay doorashoooyinka ka hor, waa in loo gudbiyaa xafiiska diiwaangeliyaha ugu yaraan hal bil (30 maalmood) ka hor doorashoooyinka.
- c. Heshiisyada isbaheysi ee la galay doorashoooyinka kadib, waa in loo gudbiyaa xafiiska diiwaangaliyaha, bil gudaheed kadib marki la shaaciyo natiijada doorashada.
- d. Heshiiska isbaheysiga waa in la waafajiyaa arimaha lagu qeeexay jadwalka saddexaad.

Qodobka 10aad:
Isku Biirid Xisbiyo Siyaasadeed.

1. Xisbi siyasadeed wuxuu ku biiri karaa xisbi/xisbiyo kale.
2. Sharci ma ahan Isku biiris kasta ee xisbiyo siyaasadeed haddii aysan waafaqsanayn sharcigan, sharuucda iyo hab-raaca xisbiyada.
3. Go'aanka ku biritaanku waa inuu noqodaa mid qoraal ah, waxaana u xilsaaran fulinta ama meelmarinta heshiiska madaxda xisbiyada ee loo idmaday si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka xisbiyadaas.
4. Golayaasha fulinta ee xisbiyo isku biiray sida ku xusan qodobka 10-aad faq 2-aad waa: -
 - a. Inuu go'aamiyo dastuurka, shuruucda, hab-dhaqanka, iyo mabaadi'da saldhiga u noqonaya xisbiga cusub iyo diiwaangelintiisa.
 - b. Inay madaxda labada xisbi wada saxiixaan heshiiska isku biiridda una gudbiyaan xafiiska diiwaangeliyaha si loo meelmariyo diiwaangelinta xisbigaas cusub lana waafajiyo sharciga.

5. Heshiiska isku biiridda la saxiihay sida ku xusan faq 4-aad xarafka (b) waa in loo gudbiyaa diiwaangeliyaha labaatan iyo kow maalmood (21) gudahood kadib marka heshiiska la saxiihay.
6. Xisbiyada siyaasadeed ee ku midoobay xisbi cusub sida ku xusan faq 4-aad xarafka (b) waxay baba'ayaan markii la diiwaangeliyo xisbiga cusub.
7. Markii uu xisbi siyaasadeed la midoobo xisbi siyaasadeed kale, xildhibaan ka tirsan, mid ka mid ah xisbiyadaas, uu aqbali waayo go'aanka xisbiyadu ku midoobeen, wuxuu dhuminayaa xildhibaanimadiisa. Xafiiska diiwaangeliyuhu mudo 30 maalmood gudahood ah wuxuu ku dhawaaqayaa dib u soo doorashada xubinimada banaanaatay.

Qodobka 11aad:

Xubnaha Ka Reeban Ka Mid Noqoshada Xisbiyada Siyaasadda.

- a. Ciidamada Qalabka Sida
- b. Garsoorayaasha Maxkamadaha Dalka
- c. Hawlwadeenada Safaaradaha (Diplomaasiyiinta)
- d. Dhamaan Shaqaalaha dawladda waxaa ka reeban Inuu kamid noqdo asaasayaasha ama xubin xisbi siyaasadeed, Inuu ka qeybqaato ololeynta ama dardargelinta hawlaha xisbi iyo kulammadiisa, Inuu muujiyo ujanjeerida xisbi siyaasadeed si oraah ama qoraal ah oo wax u dhimi karta dhedhexaadnimadiisa.

Qodobka 12aad:

Iska Casilid Xubinnimada Xisbi Siyaasadeed

1. Qofkii doonaya in uu iska casilo xisbi siyaasadeed, waa in uu siyaa ogeysiis qoraal ah ka hor inta uusan ku dhawaaqin is casilaadiisa:
2. Xisbiga siyaasadeed ee uu ka tirsan yahay
3. Xoghayaha guud ee aqalka baarlamaanka uu xubinta ka yahay.
4. Is casilidda xubinta ka tirsan xisbiga siyaasadeed ama labada aqal ee baarlamaan midkood waxay dhaqangeleysaa marka is casilidda qoraalka ah ay soo gaarto xoghayeyaashhooda.
5. Xoghayaha aqallada baarlamaanka mid ka uu ka tirsan yahay iyo xoghayaha xisbiga uu xubinta ka yahay waa inay diiwaangeliyaha gaarsiyyaan iscasaadaas toddoba (7) maalmood gudahood.
6. Iscasilaada xubintu waa inay noqotaa mid waafaqsan qodobka 59-aad faq1 (c) iyo faq 2-aad ee dastuurka federaalkaah.
7. Qofna isku mar kama tirsanaan karo tiro ka badan hal xisbi.
8. Qof ka tirsan xisbi siyaasaded ee wuxuu luminayaa xubinnimada xisbiga uu ka tirsan yahay si waafaqsan sharcigan iyo qodobka 59 (1) (c) iyo (2) ee Dastuurka federaalka ah haddii uu ku dhaqaaqo falalka soo socda.
 - a. Sameysto xisbi siyasaded kale;
 - b. Ka qeybqaato sameynta xisbi siyasadeed kale;
 - c. U ololeeyo sameynta xisbi siyasadeed kale;

- d. Dhiirrigaliyo fikradaha, danaha iyo siyaasadaha xisbi kale;
 - e. Ka soo horjeesta go'aanka xisbigiisa oo ku biiray xisbi kale ama heshiis isbahysi la galay.
9. Cidda hor istaagta ama isku dayda inay cabburiso dhaqdhaqaq siyaasadeed oo sharciga waafaqsan wuxuu galay danbi lagu mutaysanayo, ganaaax lacageed oo dhan Sh. So labaatan (20) milyan oo u dhiganta (\$1000) ama ugu badnaan hal (1) sano oo xarig ah, ama labadooda oo la isugu daray.
10. Qodobka 70-aad ee dastuurka ku meelgaarka ah ayaa qeexaya xasaanadda, iyo qaabka loo marayo xariga xildhibaan ka tirsan golayaasha barlamaanka.

Qodobka 13aad: **Xuquuqda Iyo Mudnaanta Xisbiyada Siyaasadeed.**

1. Xisbi siyaasadeed si kumeel-gaar ah loo diiwaangeliyay waxuu xaq u yeelanaya: -
 - a. Inuu shirar ku qabsankaro meel kasta oo kamid ah Soomaaliya, si uu ugu soo bandhigo dadweynaha afkaartiisa siyaasadeed, baarnaamijiyadiisa iyo weliba helitaanka iyo diiwaangelinta xubno cusub oo kusoo bira.
 - b. In xubnaha xisbigu ay shirar ku qabsan karaan dalka dibadiisa si waafaqsan faq 1-aad ee qodobkan iyagoo dhowraya shuruucda iyo xeerarka u dagsan dalka ay ku qabsanayaan shirka.
 - c. In hay'adaha ammaanku sugaan nabad-gelyada goobaha xisbigu shirarka ku qabsanayo.
 - d. Inay dawladdu si siman u siiso xisbiyada siyaasadeed, waqtii isle'eg oo ay barnaamijyadoo uga baahiyaa warbaaahinta qaranka (sida radiyaha, talefishinka, wargeesyada iwm).
2. Ololaha doorashooyinka xisbiyada siyaasadeed ku soo bandhigayaan barnaamijyadoo, iyo bandhigidda xubnaha uga qeybgelaya tartanka doorashooyinka waxay joogsanayaan toddobo (7) maalmood kahor maalinta doorashada bilaabmayso.
3. Xisbi siyaasadeed oo diiwaangelin kumeel-gaarka ah haysta xaq uma laha inuu abaabulo kulan dadweyne oo la xiriira doorashooyin ama inuu soo jeediyo ama u oleleeyo musharrax si loo doorto waqtiga doorashooyinka.
4. Xisbi siyaasadeedka ku xadgudba faq (2)(3) dembi uu caddeeyay diiwaangeliyaha ama maxkamadda awoodda u leh ee ku salaysan eedeymo kaga yimid xisbiyo ama dadweynaha, haddii eedeymahaasi ku caddaadaan waxaa laga joojinayaa ka qeybgalka doorashada. Codadkii xisbigu ka helay doorashada waa la baabi'inayaa.

Qodobka 14aad:

Maqaam Sharciyeed (Shaqsiyad Qaanuuneydka Xisbi) Iyo Cadeynta Hantidiisa

1. Xisbiga siyaasadeed ee si rasmi ah loo diiwaangaliyay si waafaqsan sharcigan wuxuu leeyahay shaqsiyad qaanuunayd oo dhamaystiran, shaabbad wuxuuna awood u yeelanaya inuu magaciisa ku: -
 - a. Helo ama ku bixiyo hanti.
 - b. Dacweyo ama lagu dacweyn karo.
 - c. Sameyn karo dhammaan awoodaha isagoo adeegsanaya waxyaabaha xisbi siyaasadeed sharcigu u oggolyahay.
2. Marka la guddoontsiyo shahadada rasmiga ah ee diiwaangelinta si waafaqsan qodobka 7-aad ee sharciga, xisbiga siyaasadeed muddo soddon (30) maalmood gudahood kadib, waa inuu u gudbiyaa xafiiska diiwaangeliyaha qoraal rasmi ah oo uu si faahfaahsan ugu caddeynayo dhammaan hantida iyo kharshka, sida dhammaan deeqaha, dhigaal (dhowrto, biiro) iyo ballanqadyo taaso noqon karta lacag ama mood oo ah hanti ay bixiyeen asaasayaasha xisbigu sannadkiisa koowaad.
3. Qoraalka loo gudbiyay xafiiska diiwaangeliyaha si waafaqsan faq2aad ee qodobkan waa inay ka muuqdaan arrimahan soo socda: –
 - a. Ilaha dhaqaale iyo hantida kale ee xisbiga leeyahay.
 - b. Xogta kale ee xafiiska diiwaangeliyahu u baahdo.
 - c. Qoraal sharciyeysan oo ay saxiiyen golaha fulinta xisbiga laguna muujinayo hantida xisbiga.
4. Markuu helo qoraal sharcieed la xiriira hantida xisbiga buuxiyana dhammaan shuruudaha ku cad faq 2-aad ee sharcigan, xafiiska diiwaangeliyaha waa in muddo (30) soddon maalmood gudahood ku soo saaraa faafinta rasmiga ah iyo ugu yaraan labo ilo warbaahin sida teleshinada iyo raadiyeyaasha.
5. Ayadoon waxba loo dhimin ciqaab kale oo uu caddeeyay sharcigan ama sharci kale oo dalka ka jira, xafiiska diiwaangeliyuhu asagoo tixgelinayo qodobka 21aad faqrada 2aad wuxuu diiwanka ka saari karaa xisbi siyaasadeed haddii: –
 - a. Ku guuldareysto inuu buuxiyo shuruudaha qodobkan.
 - b. Xogta uu gudbiyay tahay mid been ah.
6. Xisbiga siyaasadeed ee ay ku caddaato inuu galay dembiga lagu xusay faq5aad xarafka (b) xafiiska diiwangeliyuhu ama maxkamadda xisbiyadu, madaxda xisbigaas waxay ka mamnuucayaan inuu magaca xisbigiisa ama xisbi kale musharrax ahaan doorasho ugu tartamo.

Qodobka 15aad:

Keydinta Xogta Xisbiga

1. Xisbiga siyaasadeed waxaa laga rabaa inuu si hufan ugu hayo xafiiskiisa dhexe iyo xafisyada uu gobollada ku leeyahayba dhammaan xogta la xiriirta hawlahaa iyo qoraallada xisbiga sida:
 - a. Diwaanka xubnaha oo waafaqsan qaabka lagu sheegay jadwalka labaad.

- b. Nuqul ka mid ah dastuurka xisbiga.
 - c. Nuqul ka mid ah baaqa, barnaamijka siyaasadeed iyo qorshayaalka xisbiga.
 - d. Xogta la xiriirta deeqaha la siiyey xisbiga haddii ay tahay lacag, qalab, gaadiid, deegaan, ama ballanqaad deeq iyo kaalmo kale oo ay sameeyeen xubnaha asaasay xisbiga ama deeq bixiyeyaal kale.
 - e. Ku talagalka kharashka xisbiga si waafaqsan shuruucda la xiriirta maareynta maaliyada dawladda.
 - f. Xogta wixii hanti ah oo uu leeyahay xisbiga goorta iyo qaabka lagu helay hantidaas.
 - g. Xisaab-xirkka ugu dambeeyay ee xisbiga ee waafaqsan mabaadi'ida xisaabaadka oo ay ka muuqato: –
 - i. Magacyada iyo cinwaannada ilaha dhaqaale ee xisbiga iyo faahfaahin ku saabsan cid kasta oo laga helay, si ay diiwaangeliyaha ugu suurtagasho inuu la xiriiro hadduu u baahdo.
 - ii. Lacagta ay bixiyeen xubnaha xisbigu.
 - iii. Nooca deeqaha lacag ama mood.
 - iv. Deeqaha aan tooska ahayn ee xisbiga iyo dhammaan caddeymaha sida ay u soo galeen iyo sida ay u baxeen. Diiwaanka kaydinta hantida iyo deymaha iyo dhammaan dhaqdhaqaqa xisaabaadka.
 - v. Xogta kale ee mudnaanta leh ee xafiiska diiwaangeliyuhu tilmaamay.
2. Qofka farageliya, waxyelleeya ama burburiya xog xisbi siyaasadeed ee diiwaangashan, wuxuu noqonayaa dembiile marka maxkamad awooda u lehi ku caddayso, waxaana laga joojinayaa musharraxnimada, haddii go'aanku soo baxo natijada doorashada kadib wuxuu luminayaa kursigii uu haystay.
 3. Xubinta xisbiga waxay xaq u leedahay in ay weydiisato nuqul ka mid ah qoraallada kaydka u ah saacadaha shaqada, iyadoo iska bixineysa wixii kharaj ah ee xisbigu leeyahay.

Qodobka 16aad:
Waajibaadka Xisbiga Ee Wargelinta Diiwaangeliyaha.

1. Diiwaangeliyuhu si waafaqsan sharcigan wuxuu qoraal ku waydiin karaa guddoomiyaha ama xoghayaha guud ee xisbiga inuu u soo gudbiyo dokumentiga xisbiga si loo hubiyo waafaqsannaanta sharcigan, madaxda xisbigana waxaa waajib ku ah inay xogtaas dhaqso ugu gudbiyaan diiwaangeliyaha muddo toddobo maalmood gudahood.
2. Diiwaangeliyuhu wuxuu nuqul ka sameysan karaa dokumentiga xisbigu u soo gudbiyey si uu ugu keydiyo xogtaas diiwaanka xisbiga.
3. Guddoomiyaha ama xoghayaha guud ee fulin waaya amarrada uga yimid xafiiska diiwangeliyaha wuxuu ku xadgudbey qodobkan, waxaana laga qaadayaan tallaabo sharcigan waafaqsan oo ah Canaan qoraal ah iyo ganaax lacageed oo aan ka badnayn tobantoban malyan oo Sh. So oo u dhiganta (\$500).

Qodobka 17aad:
Kulamada Xisbigu U Qabanayo Dadweynaha.

Xisbigii siyaasadeedkii ee doonaya inuu ku qabto goob kasta kulan dadweyne waxaa waajib ku ah inuu dhawro una hoggaansamo shuruucda dalka.

Qodobka 18aad:
Wargelin Waxka-Beddelid.

1. Haddii xisbi diiwaangashan doonayo inuu wax ka beddelo ama dib u habayn ku sameeyo:
 - a. Dastuurkiisa.
 - b. Shuruucdiisa iyo xeerarkiisa.
 - c. Darajada xil, magaca ama cinwaanka madaxda xisbiga.
 - d. Magaca xisbiga, astaantiisa, halku dhegiiisa ama midabkiisa lagu yaqaan.
 - e. Cinwaannada iyo goobaha ay ku yaallaan xarunta dhewe ama xafiisyadiisa gobollada.

Xisbigu wuxuu ku wargelinayaan diiwaangeliyaha waxka-beddelka uu sameeyay, diiwaangeliyuhuna afar iyo tobant maalmood (14) gudahood kadib markuu helo wargelinta wuxuu amrayaa in lagu faafiyoo faafinta rasmiga ah waxka-beddelkaas.

2. Xisbigu waxka-beddelka uu ku sameeyo arrimaha ku xusan faq (1) ee qodobkan wuxuu ku faafinayaan warbaahinta.
3. Markay dhammaato soddonka (30) maalmood laga bilaabo taariikhda la faafiyay wargelinta sida ku cad faq1-aad, xisbigu markuu tixgeliyo talooyinka iyo soo jeedinta dadweynaha kadib sida ku xusan faq1-aad iyo 2-aad wuxuu dhaqangelinayaan waxka-beddelkaas si waafaqsan dastuurka iyo shuruucda kale.

Qodobka 19aad:
Diiwaan Ka Saaridda Xisbiga.

1. Xafiiska diiwaangeliyuhu wuxuu liiska diiwaanka ka saarayaa xisbi siyaasadeed haddii: -
 - a. Uu khilaaf qod3-aad ee sharcigan ama uu ku xad -gudbo mabaadi'da asaasiga ah ee dastuurka kumeel- gaarka ah ee dawladda federaalka Soomaaliya.
 - b. Uu dhiirrigelin waayo ama horumarin waayo magacaabid xor ah oo caddaalad ku saleysan oo la xiriirta musharrixiinta xisbiga ee doonaya in ay tartan doorasho galaan.
 - c. Uu u hoggaansami waayo sharciga la xiriira magacaabista musharrixiinta.
 - d. Uu xurmeyn waayo qiyamka qaranka iyo mabaadi'da asaasiga ah ee dastuurka kumeel- gaarka ah ee dawladda federaalka Soomaaliya.

- e. Laga helo qaabka diiwaangelintiisa madmadow iyo gafaf sharciga ka hor imanaya.
 - f. Ay abuuraan ama ka qaybqaataan xadgudub ka hor imanaya sharciga doorashooinka.
 - g. Ay ku dhaqmaan si ka soo horjeedda qodobka 26-aad ee sharcigan.
2. Xafiiska diiwaangeliyuhu inta aanu diiwaanka ka saarin xisbi siyaasadeed, wuxuu marka hore: -
- a. Qoraal ku wargelinaya xisbiga arrimaha gaarka ah ee lagu xadgudbay.
 - b. Xisbiga lagu wargelinaya qoraal ahaan in liiska diiwaanka laga saarayo.
 - c. Xisbiga farayaa tallaabooyinka lagu saxayo xadgudubka soddon (30) maalmood gudahood ama haddii kale waa inay keenaan sababaha ay ugu malaynayaan in aan diiwaanka looga saari karin.
 - d. Haddii ay u muuqato in fal-dembiyeed la galay arrinta waxaa lagu wareejinaya maxkamadda awoodda u leh.
3. Xafiiska diiwaangeliyaha wuxuu laalayaa diiwaan gelinta xisbi siyaasadeed inta xisbiga uu saxayo xadgudubka ku xusan faq 2-aad ee qodobkan.
4. Xisbiga la laalay diiwaangelintiisa sida ku cad faq 2-aad iyo 3-aad ee qodobkan wuxuu luminaya xuquuqda iyo faa' iidooyinka lagu caddeeyay qod15-aad ee sharcigan, madaxdiisuna kama bixi karaan xisbigaas isla markaana kama mid noqon karaan iska mana isku sharxi karaan xisbi kale.
5. Xafiiska diiwaangeliyaha sida ku cad faq2-aad iyo 3-aad ee qodobkan.
6. Xafiiska diiwaangeliyuhu wuxuu liiska diiwaanka ka saarayaa xisbiga ku guuldarreysta saxidda xad- gudubyadii loo soo jeediye muddadii la siiyey gudaheeda una hoggaansami waaya sharciga iyo tilmaamaha xafiiska diiwaangeliyaha sida ku cad faq2-aad iyo 3-aad ee qodobkan.

Qodobka 20aad:

Saameyn ta Ay Yeelanayso Ka Saarista Diiwaanka.

1. Haddii xisbi siyaasadeed diiwaanka laga saaro sida ku cad sharcigan qofna looma oggola:
- a. Inuu isugu yeero kulan xubnaha ama hawl Wadeennada xisbiga waxaan ka ahayn ujeeddo ah inay kala diraan xisbiga ama ka doodaan sababaha ay ku diiddan yihiiin diiwaan ka-saaridda.
 - b. Inuu ka qaybgalo kulan, wakiilna kuma diri karo magaca xisbiga, isagoo ah xubin ama hawl Wadeen metalaya xisbiga.
 - c. Inuu faafiyo wargelin ama xayaysiisn la xiriirta xisbiga waxaan ka ahayn ujeeddooyin kulamadda ku xusan xarafka (a) ee isla qodobkan.
 - d. Inuu casumo dad inay taageeraan xisbiga.
 - e. Inuu bixiyo deeq ama deyn lagu maalgelinayo ama looga faa'iideynayo xisbiga iyo inuu magaca xisbiga ku qaado deeq ama deyn.

- f. Inuu deeq ama deyn siiyo xisbiyo kale iyo inuu isu taago musharrax xisbi kale si uu uga qeybgalo doorashada.
 - g. Inuu dammaanad qaado dhaqaale nooc kasta oo ay tahay.
2. Xisbiga diiwaanka laga saaray sida ku xusan qodobka (21) ee sharcigan, haddii uu leeyahay xubno loo doortay aqal baarlamaan (aqalka sare iyo golaha shacabka), xubnahaasi waxay sii ahaanayaan xubno inta ka harsan xilliga baarlamaanka iyagoo ah xubno madax bannaan.
 3. Iyadoon loo eegayn faq 2aad ee qodobkan haddii diiwaan ka-saaridda xisbiga ay sababtay ficol ula kac ah uu u sameeyay xubin katirsan aqallada baarlamaanka, xubintaas waxay waayeysa xubinnimada aqalka ay ka tirsan tahay.

Qodobka 21aad:
Sanduuqa Xisbiyada.

Dawladdu waxay abuuraysaa sanduuq lagu ururinayo dhaqaale oo lagu magcaabo “sanduuqa xisbiyada siyaasadeed” oo uu maamulayo xafiiska diiwaangelinta ee guddiga madaxbanaan ee doorashooyinka, kuna kormeeraayo hanti dhownka qaranka.

Qodobka 22aad:
Ilaha Sanduuqa Xisbiyada

1. Ilaha lacagta sanduuqu ka imaaneyso waxay kala yihiin: –
 - a. Xukuumadda dhewe iyo xukuumadaha xubinta ka ah dawladda federaalka waxay wadajir u bixinayaan 0.3% miisaaniyad sanadeedkooda.
 - b. Deeqo ay bixiyaan ilaha daneeya dhiirigelinta iyo horumarinta dimoqaraadiyada, waxaana shardi ah in meesha xafiiska diiwaangeliyuhu ku qaadayo lacagahan, ay noqoto meel muuqata oo daah furan ee warbaahintu goob joog ka tahay.
 - c. Dakhliga kasoo xarooda diiwaangelinta xisbiyada
2. Marka sannad miisaaniyadeed kasta dhammaado, xafiiska diwaangeliyaha waxaa waajib ku ah inuu sameeyo xisaabxir waafaqsan shuruucda lagu maammulayo xisaabaadka hay'adaha qaranka, haddii lacagaha sanduuqa ku jira wax ka soo haraanna waxay qayb ka noqoneysaa miisaaniyadda sannadeedka cusub ee sanduuqa.

Qodobka 23aad:
Qeybinta Lacagaha Sanduuqa.

1. Lacagta Sanduuqa ku soo xeroota waxaa loo qaybinayaan sidan soo socota:
 - a. Boqolkiiba sagaashan iyo shan (95%) lacagahaas waxaa saami ahaan (proportionally) loogu qaybinayaan xisbiyada sida rasmiga ah uga diiwaangashan xafiiska diiwaangeliyaha.
 - b. Boqolkiiba shan (5%) ee soo hartay waa kharajka maammulka sanduuqa.

2. Iyadoo waxba loo dhimaynin faq (1) ee qodobka 24-aad ee sharcigan, xisbi siyaasadeed xaq uma laha inuu saami lacageed ka helo sanduuqa haddii:-
 - a. Ka heli waayey waqtiga diiwaangelinta rasmiga la siiyey 10,000 xubnood oo uga diwaangashan (1/3), ugu yaraan saddex meelood meel ka mid ah gobollada dalka.
 - b. Ka badan (2/3) laba meelood oo ka mid ah saddexdii meeloodba madaxda xisbiga iyo hawladeenadiisa ay yihiin hal jinsi, hal qabiil ama hal gobol.

Qodobka 24aad:
Ujeeddada Sanduuqa Xisbiyada.

1. Lacagaha sanduuqa ee loo qoondeeyay xisbiyada diiwaangashan, waxaa loo adeegsanayaa ujeeddada waafaqsan dimoqraaddiyada sida:
 - a. Horumarinta iyo dhiirrigelinta guud ahaan muwaaddiniinta soomaaliyeed si ay ula socdaan ugana qayb qaataan arrimaha kala duwan ee saameynta ku leh siyaasadaha qaranka.
 - b. Horumarinta iyo dhiirrigelinta metalaadda heerarka kala duwan ee golayaasha la isu doorto inay ka wada muuqdaan dhammaan qeybaha bulshada ku baahsan gobollada dalka oo ay kamid yihiin haweenka, dhallinyarada, naafada, dadka laga tirada badan yahay iyo dadka la hayb sooco.
 - c. Daboolista kharashyada xisbiga gelayo waqtiga doorashooyinka iyo baahinta mabaadi'da iyo barnaamijka siyaasaddiisa.
 - d. Abaabulida iyo ku wacyigelinta bulshada dimoqraaddiyadda, hannaanka doorashooyinka iyo habraaca codbixinta.
 - e. Saameyn siyaasadda xisbigu ku yeelato qaabeeynta ra'yiga guud ee dadweynaha.
 - f. Kharashaadka maammulka iyo shaqaalaha xisbiga siyaasadeed kama badnaan karaan boqolkiiba soddon (30%) lacagta loo qoondeeyey xisbiga, inta ka soo hartayna (70%) waxaa loo adeegsanayaa hawlahaa kale ee xisbiga.
2. Lacagta loo qoondeeyey xisbiga looma adeegsan karo ujeedooyin aan ahayn kuwa ku xusan sharcigan.
3. Lacagaha looga qoondeeyey sanduuqa xisbiga siyaasadeed looma isticmaali karo:-
 - a. Si toos ah ama dadban oo loo bixiyo mushaar, gunno, khidmad, abaalmarin ama faa' iido kale, xubin ama taageere xisbi, waxaan ka ahayn xubin ka mida shaqaalaha u shaqeeya.
 - b. In lagu maalgaliyo ama lagu bixiyo arrin qaddiyad, dhacdo iyo munaasabad kasta oo sitoos ah ama dadban uga hor imanaysa anshaxa iyo dhaqan wanaaga shaqada xafiisyada iyo hay'adaha dowladda.

- c. Arrin kasta oo ujeeddadeedu tahay in si toos ah ama dadban loogu dhiso ganacsi, lagu hantiyo fa'iido maaliyadeed ama lagu gato hanti maguурто ah.
 - d. Ujeeddo kasta oo aan la jaanqaadi karin hormarinta nidaamka dimuqraaddiyadda, xibiyada badan, hab-raaca doorashooyinka ee aan ka hor imanayn dastuurka federaalka.
4. Si waafaqsan qodob 25-aad, xisbi kasta waa inuu hubiyaa, dhaqangeliyaana nidaamka isla xisaabtanka, daahfurnanta qandaraasyada, iibka iyo gadshada agabka iyo adeegga, waana inuu mar walba diyaar u yahay in xafiiska diiwaangeliyuuhu, kormeer ku sameeyo xisaabaha iyo dhamaan kharashayada xisbiga u diiwaangashan.
 5. Qofka ku xadgudba qodobbada qaybtan wuxuu galay danbi, waxaana la hor keenayaa caddaaladda.

Qodobka 25aad:

Ilaha Kale Ee Dhaqaalaha Xisbiga Ama Dhigaal Bileed Xubnaha Xisbiga

1. Ilaha kale ee dhaqaale ka soo geli karo xisbiyada siyaasadeed waa: –
 - a. Khidmadda xubantu bixiso si ay ugu biirto xisbiga.
 - b. Kaalmo aan shardi lahayn oo laga helay ilo sharciga waafaqsan.
 - c. Deeqo, codsiyo, hibooyin ka yimid ilo sharci ah oo aan ahayn dowlad shisheeye, hay'ado dowli ah ama kuwo aan dowli ahayn iyo dad shisheeye ah.
 - d. Dakhliga ka soo xarooda maalgashi, mashaariic ama waxqabad kale oo xisbigu lee yahay ama qayb ka yahay.
2. Hay'ad ama xisbi dal shisheeye oo aragti la wadaaga xisbi siyaasadeed ka diiwaangashan Soomaaliya, waxay siin karaan taageero farsamo keliya.
3. Gargaarka farsamo ee ku xusan faqarada labaad (2) ee qodobkaan kuma jirto siisimo wax hanti guurto iyo maguuto ah ee la siinayo xisbi siyaasadeedkaas soomaaliyeed.
4. Xisbigu waa inuu u soo bandhigaa diiwaangeliyaha xog tifaftiran oo la xiriirta dhammaan dhaqaalaha soo galay iyo meelaha uu ka soo galayn.

Qodobka 26aad:

Xadgudyada La Xiriira Ilaha Dhaqaalaha Xisbigu Ka Helo.

1. Xisbiga ka hela dhaqaale dad aan muwaaddiniin soomaaliyeed ahayn, wuxuu ku xadgudbay qodobka 26 faq 1-aad xar (c) wuxuuna galay danbi.
2. Qof ama urur, hal sano gudihiis uguma deeqi karo xisbi siyaasadeed, lacag ama hanti kale ee ka badan boqokiiba shan wadarta guud ee miisaaniyad sanadeedkiisa.
3. Kharashka guud ee ku xusan faq 2-aad ee qodobkan wuxuu la xiriiraa xisaabadkii xisbiga ee la hanti dhowray sannadkii hore.

4. Haddii fulinta faqrada sadexaad suurta gal noqon waaydo, sababtoo ah, la'aanta miisaaniyada sanadkii tagay, lacagta ugu badan oo lagu ganaaxaya waxay noqonaysaa \$5000.
5. Qofka ama ururka ku xadgudba faq (2-aad) iyo (3-aad) ee sharcigaanwuxuu galay faldanbiyed ciqaab lagu muteysto.
6. Xisbiga qaata deeq lacageed ee ka badan midda ku xusan faq (2-aad) ama (3-aad) ee qodobkan ciqaabta fal-danbiyedka uu galay ka sokow, waxay dowladdu kala wareegayaa hantidii la siiyay, waxaana laga reebayaa tartanka doorashada.
7. Looma adeegsan karo faq (2), (3) (6) deeqaha ama kaalmooyinka haddii ay tahay lacag ama hanti uu bixiyey xubin kamid ah asaasayaasha xisbiga iyada oo ah deeq bilow ah oo hanti u noqota xisbiga sannadka koowaad ee jiritaankiisa.
8. Haddii howl wadeen ka mida xisbiga ama qof kale ee u idmanaa inuu magaca xisbiga ku bixiyo xog laga rabo inuu siyyo xafiiska diiwaangeliyaha uu bixin waayo ama ka been sheego wuxuu mutaysanayaa ganaax lacageed oo u dhiganta inta uu qariyey ama ka been sheegay ama xabsi aan ka badnayn laba sano ama labada oo la isugu daray, waxaana laga joojinayaa tartanka doorashooyinka.

Qodobka 27aad:

Faafinta Ilaha Dhaqaale Ee Xisbiga.

1. Markuu dhammaado sanad misaaniyadeedku Xisbigu sagaashan maalmood gudahood wuxuu faafinayaa: –
 - a. Ilihiisa dhaqaale isagoo caddeenaya: –
 - i. Qaddarka lacagta uu ka helay sanduuqa xisbiyada.
 - ii. Qaddarka lacagta uu ka helay xubnahiisa iyo taageerayaashiisa.
 - iii. Qaddarka lacagta uu u helay deeq iyo kaalmo ahaan.
 - b. Dakhliga iyo kharashka xisbiga.
 - c. Hantida iyo daymaha lagu leeyahay xisbiga.
2. Faafinta lagu sheegay faq 1-aad ka sokow, waan in lagu faafiyaa labo kamid ah warbaahinta dalka.
3. Xisbiga ku xadgudba qodobkan wuxuu mutaysanayaa ciqaab.
4. Iyadoo aan laga tageyn nuxurka faq 3-aad ee qodobkan, xisbiga ku guuldareysta inuu meelmariyo sharcigan waxaa laga joojinayaa lacagtii uu ka heli lahaa sanduuqa, ilaa inta uu u hoggaansomayo sharcigan lagana gaarayo doorashada dambe.

Qodobka 28aad:

Xogta Laga Rabo Xisbiga Doorashada Ka Hor.

1. Xisbigu, waa inuu u soo gudbiyaa xafiiska diiwaangeliyaha soddon (30) maalmood kahor liiska guud ee xubnabiisa inta uusan magacaabin xubnaha uga qeybgalaya doorashada, waana inuu soo raaciyya qoraal caddeynaya hantidiisa iyo daymaha lagu leeyahay oo waafaqsan foomka loo cayimay.
2. Iyadoo aan waxba loo dhimin ciqaabaha sharcigan iyo shuruucda kale waxaa diiwaangeliyuu ka saarayaa diiwaanka xisbigii:

- a. Ku dhaqmi waaya qodobkan;
- b. Usoo gudbiya xafiiska diwaangeliyaha xog been ah.

Qodobka 29aad:
Hantidhowridda Xisaabaadka Xisbiga.

1. Xisbi kasta waxaa waajib ku ah inuu kaydiyo buugaagta, qoraallada xisaabaadka, dakhliga, kharashka, hantida iyo daymaha.
2. Xisbigu muddo saddex (3) bilood gudahood ah kadib dhammaadka sannad miisaaniyadeed kasta waa inuu u soo gudbiyaa hanti dhawraha guud xisaab xirka xisbiga sannad miisaaniyadeedkii dhammaaday.
3. Xisaabaadka xisbiyada waxaa xisaabxirka sameynaya hantidhawraha guud, wuxuuna u gudbinayaa xafiiska diiwaangeliyaha iyo golaha shacabka.
4. Xafiiska diiwaangeliyuhu wuxuu waqtii kasta ka codsan karaa hantidhawraha guud inuu xisaabxir ku sameeyo xisaabaadka xisbi kasta ama xisbiyada oo dhan.
5. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in weydiisto xafiiska diwaangeliyaha in uu nuql uga daabaco xisaabxirka u keydsan xisbiga, kadib markuu iska bixiyo khidmada uu tilmaamo xafiiska diiwaangeliyaha.

Qodobka 30aad:
Hawlaha Diiwaangeliyaha.

Hawlaha xafiiska diiwangeliyaha waxay noqonayaan: –

- a) Diiwaangelin, hagid, u kuurgelid, kormeerd iyobaaridda ay ku hubinayaan in xisbiyada siyaasaddu dhowrayaan kuna dhaqmayaan sharcigan.
- b) Maammulidda sunduuqa xisbiyada.
- c) Xaqiijinta faafinta xisaab sannadeedka la hanti-dhowray ee xisbiyada.
- d) Hubinta iyo shaacinta diiwaanka xubnaha xisbiga.
- e) Kaydinta diiwaanka Xisbiyada iyo astaaamahooda.
- f) Xaqiijinta in qof uusan ka mid ahayn hal xisbi ka badan, haddii ay muuqatana in qofkaasi u diiwaangashan yahay hal xisbi ka badan, diiwaangeliyuhu wuxuu qoraal ku wargelinayaa xisbiyada uu u diiwaangashan yahay farayaana inay sharciga waafajiyaan muddo shan iyo tobantoban beri (15) gudahood ah.
- g) Hubiyo xaqiijiyaninaan qofna lagu qori karin diiwaan xisbi lana sharrixi karin isagoo/iyadoo aan oggolaansho laga helin, xisbiga falkaas lagu helana wuxuu mutaystay dembi.
- h) Hubiyo, xaqiijiyo, kormeero magacaabista musharraxiinta xisbiga gudihiisa doorashada u tartamaya inay waafaqsan tahay shuruucda u degsan xisbiga.
- i) Baaro cabashooyinka soo gaara isagoo adeegsanaya si waafaqsan sharcigan.

- j) Qabto shaqo kasta oo kale ee sharcigani ama shuruucda kale ee dalka u jideynayaan ama awood u siinayaan.

Qodobka 31aad:

Dhismaha Guddiga Isku Xirka Xisbiyada Diiwaan Gashan.

1. Waxaa la dhisi doonaa madasha xog isweedaarsiga iyo wadatashiga heer qaran iyo heer dowlad gobleed waxayna ka kooban tahay:
 - i. Labo (3) xubnood oo ka socota xafiiska diiwaangeliyaha ama Guddiga Doorashoyinka
 - ii. Labo (2) xubnood oo ka socota xisbi kasta oo diiwaangashan.
2. Hawlaha ugu muhiimsan ee Guddiga isku xirka xisbiyada siyaasadeeda waa inuu abuuraa madal ay ku wada xaajoodaan, xisbiyada, iyo guddiga doorashooyinka.
3. Guddiga isku xirka xisbiyada siyaada iyo xafiisyada la xiriira waxaa gudoomiye u noqonaya xubin ka socota xafiiska Guddiga Doorashoyinka oo ah Xafiiska Diiwan-gilinta iska leh.

Qodobka 32aad:

Dhamaynta Khilaafaadka Xisbiyada.

Khilaafaadka ka dhasho Axsaabta Siyaasada dhexdeeda, waxaa loo kala qeybinaya labo nooc oo kala ah:

1. Haddii uu khilaafku yahay mid salka ku haya arrimaha maaliyadda iyo maamulka waxaa dacwo qaadisteeda iyo go'aan ka gaaristeeda iska leh Maxkamadda Gobolka ee caadiga ah, waxaana racfaan looga qaadan karaa Maxkamadda darajada labaad.
2. Haddii khilaafku salka ku hayo dacwo la xiriirta arrimaha xaquuqda dastuuriga, waxaa dacwo qaadisteeda iyo go'aan ka gaaristeeda iska leh Maxkamadda Dastuuriga ee Dalka.

Dacwada ma tagheeyso maxkamad iyadoo aan marka hore laga quusan in khilaafkaas lagu xaliyo xeerarka xalinta khilaafaadka ee u degsan xisbiyada siyaasadda.

Qodobka 33aad:

Go'aan Gaarista Maxkamadda.

Waxaa waajib ah in Maxkamaddu deddejiso go'aan ka gaarista khilaafaadka la hor keeno, waana inay go'aankeeda ku gabagabaysa muddo soddon (30) maalmood gudahood oo ka bilabamaysa maalinta dacwadda la gaarsiyo.

1. Go'aanka Maxkamadda Gobolka gaarto waxaa racfaan looga qaadan kara maxkamadda Darajada 2aad ee dalka. maxakamadaha madaniga ah.

Qodobka 34aad:

Xadgudubyo

1. Qofku wuxuu galay dembi haddii uu: -
 - a. Ku guuldarysta inuu gudbiyo xog ay ahayd in xisbiga laga helo.

- b. Faafiyo xog uu ogyahay inay been tahay ama uusan hubin runnimadeeda.
 - c. Si xilkasnimo darro ah u abuuro ama u samayo oraah been ah.
2. Haddii xisbigu galo dembi, waxaa loo arkayaa in mas'uuliinta sare ee xisbigaasi galeen dembiga.
 3. Haddii hay'ad taageerta xisbi gasho dembi ka soo horjeedda sharcigan waxaa dembigaas lagu qaadayaa howlwadeennada hay'adaas.
 4. Haddii ay dembi gasho koox iskaashi la leh xisbiga waxaa dembigaas lagu qaadayaa xubin kasta oo kamid ah kooxdaas.
 5. Qofna dembi ma gelin haddii lagu soo eedeeyey iyadoo loo cuskanayo faq 1 ama 2 ay maxkamadu caddayso oggaal la'aantiisa.
 6. Haddii xisbi galo dembi sharcigani tilmaamay, xafiiska diiwaangeliyuu wuxuu awood u leeyahay:
 - a. Inuu siiyo digniin qoraal ah uu kaga dalbanayo xisbiga inuu saxo arrimaha lagu haysto muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah.
 - b. Inuu laalo diiwaangelinta xisbiga muddo lix (6) bilood gudahood ah
 - c. Inuu ka hakiyo lacagaha xisbiga siyaasadeed muddo lix (6) bilood gudahood ah.
 - d. Tallaabo kasta oo uu diiwaangeliyuu qaadayo si waafaqsan Qdobka5 faq b,c iyo d waxay bilaabmaysaa sannad ka- hor xilliga doorashada waxayna dhammaanaysaa ugu yaraan lix bilood kahor xilliga doorashada
 - e. Inuu si waafaqsan qdobka 21aad ee sharcigan diiwaanka ka saaro xisbiga.
 7. Qof xubin ka ah xisbi siyasadeed ee la laalay ee kujira golaha shacabka federaalka ah, wuxuu sii ahaanayaa xubin madaxbannaan oo ka mid ah golaha shacabka inta ka dhiman wakhtiga barlamaankaas.
 8. Diiwaangeliyaha ama shaqaale ka tirsan xafiiska diiwaangeliyuu wuxuu galay dembi haddii ay ku kacaan ama garab maraan si ulakac ah ujeeddooyinka dastuurka iyo sharcigan.
 9. Qofka lagu helo dembi inuu sharcigan jabiay oo aan sharcigani caddeynayn ciqaabtiisa wuxuu mutaysanayaa ganaax lacageed oo gaaraya ugu badnaan Sh.So (100) malyan oo u dhiganta (\$5,000) ama xarig aan ka badnayn hal (1) sano ama labadaba, wuxuuna dhuminayaa xubinnimadii xisbiga iyo inuu u tartamo doorashada soo socota.

Qdobka 35aad:

Kala Diridda Xisbi Siyaasadeed

Habka kaladiridda xisbiga siyaasadeed waa sida soo socota:

1. Diiwaangeliyuu markii uu xisbi diiwaangelinta ka saaro ama shaaciyo inuu yahay xisbi la mamnuucay si waafaqsan sharci kasta wuxuu wargelinayaa xeer ilaaliyaha guud ee qaranka muddo toddobo (7) maalmood gudahood ah.
2. Marka xeer ilaaliyaha guud ka helo diiwaangeliyaha amarka kala-dirista ama mamnuucidda xisbiga, wuxuu dacwad ka furayaa habkii loo kala diri lahaa xisbigaas iyo sidii laga yeeli lahaa hantidiisa guurtada iyo maguurtada ah,

xuquuqdiisa iyo deymaha lagu leeyahay, muddo toddobo (7) maalmood gudahood ah.

3. Maxkamadda sare markay ka hesho xeer ilaaliyaha guud dacwadda kala -dirista xisbiga kuna qanacdo waxay ka soo saareysaa go'aan waafaqsan sharciga, muddo shan iyo tobant (15) maalmood gudahood ah.

Qodobka 36aad:

Xeerarka Habsami U Socodiinta Qodobada Sharcigan.

1. Diiwaangeliyaha ayaa soo saari doono xeerar guud oo si wanaagsan loogu dhaqan gelinaayo qodobada sharcigan:
 - a. Magacaabista musharaxiinta xisbiyada.
 - b. Xeerarka iyo nidaamka xisbiyada siyaasadeed.
 - c. Xeerka nidaaminaya lacagaha ay isticmaalaan musharaxiinta iyo xisbiga doorasho walbo
 - d. Xog siinta iyo toosinta xisbiyada si looga caawiyo isu diyaarinta iyo dhaqangelinta doorashoooyinka si waafaqsan sharcigan.
 - e. Wuxuu qeexaya qaabka diiwaangelinta xisbiyada.
 - f. Wuxuu nidaaminaya hawlaha xisbiyada diiwaangashan si waafaqsan sharcigan.
 - g. Wuxuu nidaaminaya ama xaddidayaa isticmaalka ama beddelidda magacyada, astaamaha ama midabada xisbiyada.
 - h. Wuxuu dejinaya qaabka xisbigu diiwaangeliyaha ugu gudbiyo warbixin sannadeedka ama xilliyeedka ku saabsan dastuurkiisa, ujeedooyinkiisa iyo xubinhiisa.
 - i. Diiwaangeliyuhu waa inuu xaqiijiyya warbixinta uu usoo gudbinayo xisbigu inay ku caddahay xisaab-xir hantidhowran iyo xisaabaadka maaliyadeed ee laxiriira hantida, deymaha, dakhliga iyo kharajaadka xisbiga.
 - j. Dejinta khidmad kasta oo lagu qabatay hawl la xiriirta sharcigan.

Qodobka 37aad:

Qodobbadda Kala-Guurka.

- 1) Iyadoo aan wax loo dhimayn qodobada sharcigaan: -
 - a. Xisbi siyaasadeed jiritankisu wuxuu bilaabamayaa marka sharcigani dhaqangalo ee diiwaangelintiisa kumeel-gaar ah dhameystiranto.
 - b. Diiwaangelinta xubnaha xisbiga, deeqaha iyo khidmada xubnaha bixiyaan si waafaqsan sharcigaan waxay bilaabamaysaa marka sharcigani dhaqangalo.
 - c. Xubnaha hore uga tirsanaa xisbi inta uusan sharcigani dhaqangelin, waxay sii haynayaan xilalkooda.
 - d. Diiwaangelinta dhameystiran ee xisbiyada waxay dhaceysaa mudo aan ka yareen lixdan (60) maalmood ka hor doorashoooyinka.

- e. Magacyo xileedka ee ku xusan sharcigan way jirayaan ilaa lagasoo saaro sharci kale oo bedelaya.

Qodobka 38aad:

Dhaqangalka Sharciga

Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa taariikhda uu baaralamaanka ansaxiyo, islamarkaana uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

Jadwalka 1AAD:

Hab dhaqanka Xisbiyada Siyaasadda.

1. Axsaabta siyasaddu iyagoo dhaqan gelinaya cutubka 4-aad ee dastuurka kumeel-gaarka ee soomaaliya iyo qodobka 3-aad, 9-aad ee sharcigan waxay u hogaansamayaan ilaalinayaana hab-dhaqankan (code of conduct)
2. Hab dhaqankan wuxuu nidaaminaya sida laga rabo inay u dhaqmaan xubnaha xisbigu, hawladeenada xafiisyada Axsaabta, musharaxiinta ku tartamaya magac xisbi iyo tageerayaashooda, ayagoo dhiiri gelinaya maamul-wanaagga kana dheeraanaya ku dhaqanka iyo dhiiri gelinta siyaasadaha xun
3. Tartanka siyaasadda iyo iskaashiga axsaabta waxaa nidaaminaya hab-dhaqankan oo saldhigiisu yahay dhowrista sareynta sharciga si waafaqsan halbeegga caalamiga ee la isla ogoly ahay.
4. Xisbiyada siyaasaddu waa inay:
 - a. Horumarinyaan siyaasadaha iyo barnaamijyada kala duwan ee ka tarjumaya danaha, dareenka, iyo baahida dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed.
 - b. Xurmeeyaan, taageeraanna tartanka dimuqaraadiga ah ee lagu raadinayo hanashada awoodda siyaasadeed iyo hirgelinta barnaamijyada horumarineed ee u qorshaysan.
 - c. Abuuraan jowi dareen qaran ee lagaga fogaanayo keli talinta, looguna dhowaanayo wada tashiga iyo in la wadaago go'aamada qaran ee muhiimka ah.
5.
 - a. Xisbi siyaasadeed kasta waxaa laga doonaya in uu ilaaliyo xaqqa ka qaybgalka siyaasadeed, isagoo dhowraya u sinnaanta muwaadiniinta, tixgelin gaar ahna siinaya dhallinyarada, dadka laga tirada badan yahay iyo dadka la hayb sooco,

- b. Dhawraa xuquuqda aadanaha iyo xoriyadda asaasiga, Xurmaya, dhiirrigeliyaa sinaanta jinsiga (dhadigga iyo laboodka),
 - c. Kamuuqataaa dulqaad iyo talo wadaag howlahooda siyaasadeed
- 6. Xisbi siyaasadeed kasta waa inuu: -
 - a. Xurmeeyaa, taageeraa, isla markaasna difaacaa dastuurka kumeel-garka ah ee jamhuuriyadda federaalka soomaaliya oo ku dhisan shareecada islaamka.
 - b. Xurmaya, ku dhaqmaa sharcigan, sharciga doorashooyinka iyo shuruucda kale ee dalka.
 - c. Dhawraa, ku dhaqmaa, difaacaa xeerka xisbiga u degsan, xeerka doorashooyinka xisbiga gudahiisa, xeerka magacabidda hawl wadeennada xisbiga iyo xeer kasta ee u degsan xisbi siyasadeed kasta oo aan ka hor imaanayn hab dhaqankan.
 - d. Xurmeyaa, taageeraa, horumariyaa sharafta aadanaha, sinnaanta, cadaaladda bulshada oo buuxda oo laga ilaalinayo is takoorid iyo liididda bulshada qeyb ka mid ah.
 - e. Xurmeyaa, tageeraa, hormariyaa xuquuqada aadanaha iyo sareynta sharciga.
 - f. Horumariyaa dareenka wadaninimo iyo midnimada qaranka.
 - g. Xurmeeyaa, taageeraa horumariyaa mababaa'diida dimoqoradiyadda iyo mabaa'diida asaasiga ah ee lagu cadeyay dastuurka kumeel-gaarka ah, asagoo hubinaya in dhamaan xubnaha xisbigu ka wada qayb qaataan isla xisabtanka iyo maamul wanaagga, si loo horumariyo guud ahaan wadanka.
 - h. Xurmeeyaa, taageeraa horumariyaa sharafta, qadarinta, dulqaadka, maamul wanaaga iyo hufnaanta isla xisaabtanka
 - i. Horumariyaa iskaashiga tartanka siyaasadeed.
 - j. Horumariyaa wax wada lahaanshaha, isbedelka awoodda hogaa mineed iyo tan khayraadkaba.
 - k. Xurmeeyaa, taageeraa, horumariyaa ku dhaqanka dimoqoradiyadda iyo tartanka doorashada xorta ah ee xisbiga dhaxdiisa ah si loo helo hoggaan xisbi ee la soo doortay ee heerkasta ah.
 - l. Xurmeeyaa, taageeraa, horumariyaa ku dhaqanka dimoqoradiyadda iyo doorashada xorta ah ee xalaasha ah, Lana aqbali karo marka xisbiga

siyasadeed soo sharaxayo tartamayaashiisa iyadoo la waafajinaayo xeerka xisbiga iyo sharcigan.

- m. Qadariya, taageeraa horumariyaa hogaminta iyo sharafta sida uu tilmaamay dastuurka kumeel-gaarka soomaaliya.
- n. Ka muuqataa dhammaan shuruucda iyo xeerarka xisbiga daahfurnan iyo isla xisaabtan.

7. Xisbiga siyaasadeed waxaa ka reebban:

- a. Inuu ka qayb-qaato ama dhiirrigeliyo carqalad ay samaynayaan taageerayaashiisu.
- b. Inuu dhiirrigeliyo kana qayb-qaato nooc kasta oo dhaqan xumo ah (bahdilaad) loona geysanayo taageerayasha xisbiya kale ama dad muwaadiniin ah.
- c. Inuu qayb ka noqdo abaabulka iyo wax is weydaarin ganacsi, laalush iyo nooc kasta oo musuq ah.
- d. Inuu qaato laaluush, ogolaado inuu bixiyo.
- e. Inuu aqbalo isticmaalana hanti dad wayne, oo aan ka ahayn inta looga qoondeeyay sanduuqa xisbiyada siyaasadda.
- f. Inuu u ololaleyo hurin fidno is nacayb, kicin qabiil, wax ka sheeg dad kale, iyo kicin kasta oo ay ka dhalan karto waxyeello iyo dhibaato.
- g. Inuu hor istaago, carqaladeeyo, qaso, babi'yo, ama fara galiyo kulan, isu so bax ama bananbax ay samaynayaan taageerayaasha xisbi siyasadeed kale ama hogankiisa
- h. Inuu haysto ama abuuro xoogag hubaysan sida maleeshiyaad ama ururo kuwas oo kale ah oo uu xiriir la leeyahay.
- i. Inuu u isticmalo hanti dowladeed olole guracan oo dhib keeni kara.

8. Xisbi kasta waa inuu horumariyaa xiriirka xisbiyada asagoo: -

- a. Xaqijinaya in axsaabtu si xor ah u tartamaan, xisbi kastana lagu tixgeliyo mabaadi'da siyaasadiisa iyo aragtidiisa.
- b. Inuu adkeeyo is aaminidda iyo isku kalsoonaanta xubniiisa dhexdooda; iyo habka wada shaqeynta iyo is kaashiga meel marinta nabadda, horumarka iyo wax wada lahaanshaha.
- c. Maareyo, xalliyo, isuna soo dhoweeyo kala duwanaanshaha aragtiyada siyasaadeed, and iyadoo loo marayo wada xajood wax ku ool ah oo lagu

xaqiiinayo isla jaan qaadida xisbiyada si looga mira dhaliyo dimaqaraadiyadda.

Dhiirigeliya dib u heshiisiin iyo midnimo qaran

Jadwalka 2aad:

Qeybaha Uu Ka Kooban Yahay Dastuurka Iyo Xeerarka Xisbiga Siyaasadeed

1. Magaca xisbiga siyasadeed iyo sida loo soo gabiyay.
2. Astanta, calaamadda iyo midabka xisbiga.
3. Ujeedooyinka xisbiga.
4. Aragti si cad lo qeexay, oo muujinaysa himilada, mabaad'ida iyo qiyamka xisbiga hageya
5. Goobta iyo Cinwaanka sanduuqa boostada ee xafiisyada u diwaan gashan.
6. Waxyabaha looga baahan yahay xubinta waa:-
 - a. Buuxinta Shuruudaha xubin lagu noqon karo.
 - b. Bixinta lacagta xubin kaga noqoshada xisbiga.
 - c. Shuruudaha iska casilida xubinimada xisbiga ama waayista xubinimada xisbiga;
 - d. Xuquuqda iyo waajibadka xubnaha xisbiga.
 - e. Macluumaadka lagu aqoonsanaayo xubinta sida magaca oo saddexan, da'da, goobta dhalashada, Gobolka, Degmada, jinsiga, oo dhamaantoodod loo baahan yahay in ay diiwaanka ku qornaadaan.
 - f. Habraaca loo adeegsanayo kulan sanadeedka guud, iyo kulamada waqtiyaysan ee heerarka kala duwan sida kulamada heer degmo, gobol, dowlad goboleed iyo heer qaran.
7. Macluumaadka looga baahan yahay golaha fulinta xisbiga si diiwaanka lagu qoro:-
 - a. Magaca golaha fulinta xisbiga.
 - b. Buuxinta shuruudaha doorashada guddiga fulinta iyo qaabka ku haboon oo loo marayo.
 - c. Jagada, magaca xilka, iyo shaqada laga qabanayo xafiska iyo mudada xilka.
 - d. Xuquqda iyo waajibadka xubnaha guddiga fulinta.

- e. Hab-raaca doorashada xubnaha guddiga fulinta, Guddi hoosaadyada u xilsaran hawlaha kala duwan, unugyada laamaha, iyo cawiyayaasha.
 - f. Hagaha golaha fulinta, gudiyada, unugyada iyo cawiyayaashoodu raacayaan marka ay fulinayaan hawlhooda.
 - g. Guntanka kulamadda.
 - h. Joogtaynta kulamada.
 - i. Awooda go'aan garista.
 - j. Tilmaamaha sida shirarku u dhacayaan, hab-raaca isugu yeeridda kulanka, habka la raacayo inta uu shirku socdo iyo hadal qoraalka shirkha iyo in si rasmi loo muujiyo go'aanada shirkha lagu gaaro iyadoo la muujinayo goobta shirkha ka dhacay, waqtiga uu dhacay iyo xubnihii ka soo qeygalay.
8. Taxanaha qaab dhismeedka mamulka xisbiga iyo hanaanka ay tahay in loo diyariyo waxaa ka mid ah:
- a. Xogta shaqalahaa iyo shuruudaha shaqaleynta.
 - b. Cududa hawladeenada, diyaarinta qoraalada la xiriira maaliyadda iyo xisab xir la ansixiyay.
 - c. Laamaha xisbiga ee gobol kasta.
9. Dhismaha laamaha xisbiga ku yeelanayo dalka gudahiisa iyo dibadiisa iyadoo la tilmaamayo dowrka iyo masuuliyadda laamahaas.
10. Qaab dhismeedka maaliyadeed iyo hanaanka waxaa kamid ah: –
- a. Kaalinta iyo waajibaadka sarkaal kasta oo ka mid ah saraakiisha xisbiga, guddiga fulinta, ee la xiriira maliyadda xisbiga.
 - b. Warbixin sanadeedka iyo xisaab xirkha maaliyadda xisbiga siyaasaded iyo
 - c. Ujeedada loo isticmaalay dhaqaalaha iyo khaas ahaan waxyaabaaha ka reeban in loo isticmaalo oo ay ka mid tahay in dhaqaalaha loo qaybiyo xubnaha xisbiga
11. Qaab dhismeedka guud iyo maamulka xisbiga oo ay kamid tahay qaab dismeedka gobollada iyo hanaanka hoggaanka fulinta, ee heer gobol iyo heer qaran.
12. Dhismaha iyo maamulidda aqalka Sare iyo Golaha Shacabka, baarlamaanada dowladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ee J.Soomaaliya iyo golayaasha degmooyinka.

13. Tilaabooyinka anshax marinta ee laga qaadayo xubin ama sarkaal xisbi siyaasadeed waxaa ka mid ah: –

- Qaabka iyo hab-raaca tilaabooyinka anshax marinta.
- Falalka mudan anshax marin iyo sababaha.
- Shuruudaha kala duwan ee anshax marinta.
- Iyo saamaynta anshax marin kasta ku yeelan karto heer qaran iyo heer gobolba.

14. Xubin ka mid ah xisbiga ama Dadweynaha kale, waxay xaq u leeyihii in ay baaraan buugaagta iyo diiwaanka xubnaha xisbiga siyasadeed.

15. Saraakiisha idman ayaa u saxiixaya xisbiga: –

- Dukumiintiyada lagu wareejinayo xafiiska diiwaangeliyaha sida Diiwaanka xubnaha, warbixinada, heshiiska la midowga xisbi ama xisbiyo kale iyo isbahaysi kasta oo siyaasadeed.
- Maaliyadda iyo xisaabaadka bangiga ee xisbiga.
- Xisaab xir sanadeedka iyo dhaqdhaqaaqa lacageed ee xisbiga.
- Warbaxin ama dokumiinti kasta ee uu xisbiga ku waajibinaayo sharcigan ama shuruucda kale ee dalka.
- Shahaadada magacabis kasta ama doorasho xubin ka mid ah xisbiga.

16. Dokumeentiyada siyaasadeed ee xisbigu soo saari doono kuna shaqeyn doono oo ay ka muuqato qaabka iyo hab-raaca loo soo saarayo dokumentigaas, iyo sida loo meelmarin doono ama loo hiremlin doono.

17. Dokumeentiyada siyaasadeed iyo joogtayntooda oo uu xisbigu soo saarayo, waxay noqon doonaan kuwa lagu muuiiyay habka lagu soo saaray, lagu ansixiyay laguna faafiyay.

18. Siyaasadaha iyo hab-raaca maareynta hantida, ilaalinta, maalgelinta dhaqaale, hantida xisbiga, iyo tilmaamista shaqsiyaadka mas'uulka ka ah

19. Xeerarka iyo shuruucda Magacaabista xubnaha xisbiga uga qayb geliya doorashooyinka, iyo diyaarinta liiska u tartamayaasha xisbiga waqtiga doorashooyinka

20. Muujinta Qodobada la raacayo marka wax laga bedelayo magaca, dastuurka iyo shuruucda xisbiga siyaasadeed.

21. Xeerka iyo habraaca la raacayo marka xisbi mid kale ama kuwo kale la midoobayo waxaa ka mid ah: -

- a. Xaaladaha iyo shuruudaha midowga.
 - b. Hab-raaca iyo tilmaamida midowga ay waajib tahay in laga ansaxiyo kulan sanadeedka guud ee xisbiga.
22. Qodobada Xeerka ee tilmaamaya qaabka loo marayo marka la baabi'nayo xisbi siyaasadeed ama laamiiisa waxaa ka mid ah: –
- a. Qodobada la xiriira ilaalinta iyo meel ku ogaanshaha hantida xisbiga.
 - b. Qaabka iyo hab-raaca loo baabi'inayo xisbiga ama laamiiisa mid ka mid ah.
23. Habka xallinta khilafaadka xisbiga gudahiisa.
24. Ilaalinta xuquuqda iyo ku dhaqanka demoqoraadiyadda si loo hubiyo ka qeybgelinta haweenka, dadka laga tirada badanyahay iyo kuwa la hayb sooco dhammaan hawlaha xisbiga.
25. Ku dhaqanka demoqoraadiyadda waa inay ka muuqataa dhowrista iyo adkaynta xuquuqda siyaasadeed ee aadanaha gaar ahaan haweenka.
26. Qaabka loo hirgelinaayo muhiimadaha/qiyamka dadka soomaaliyeed iyo mabaa'diida maaamul wanaaga ee lagu tilmaamay dastuurka Qaranka.

Jadwalka 3aad:

Shuruudaha Asaasiga Ah Ee Heshiishyada Isbahaysiga

1. Heshiiska isbaheysi waa in uu waafaqsan yahay qodobada ku tilmaaman shuruucda iyo habraaca xisbiyada siyaasadeed ee wada samaysanaya isbaheysigaas.
2. Heshiiska isbaheysiyada waa in ay galaan golayaasha fulinta xisbiyada gelaya isbahaysiga waana in ay ahaadaan: –
 - a. Mid qoraal ah oo ay si buuxda u fuliyaan masuuliyiinta xisbiga ee u xilsaaran.
 - b. Mid uu ogolaaday diiwaan-geliyaha u idman.
3. Heshiiska isbahaysigu waa in lagu sheegaa: –
 - a. Xisbiyada xubnaha ka ah isbaheysiga.
 - b. Siyaasadaha iyo ujeedooyinka isbaheysiga;
 - c. Qaab dhismeedka guud ee isbaheysiga.
 - d. Qaab dhismeedka guud iyo maamulka isbahaysiga ee golah fultina heer federal, heer dawlad goboleed, heer gobol, degmo iyo heer laameed.

- e. Tilmaamaha iyo shaxda awood qaybsiga ee heerarka dhismaha isbahaysiga, doorka iyo waajibaadka isbahaysiga dhaxdiisa.
- f. Xeerarka doorashada isbahaysiga dhaxdiisa.
- g. Xeerarka magacaabista isbahaysiga dhaxdiisa
- h. Xeerarka iyo habraacyada qaab dhismeedka go'aan qaadashada.
- i. Curinta siyaasadaha, wada tashiga, qaab dhismeedka go'aan qaadashada, xeerarka iyo habraacyada siyaasadadda.
- j. Hab dhaqanka isbahaysiga oo ay ka mid tahay qiyamka iyo mabaadiida hagaya wax qabadka shaqsyaadka iyo xubnaha xisbiyada isbahaystay.
- k. Qaabka iyo hab-raaca xalinta khilaafadka.
- l. Dhaqan gelinta, xoojinta iyo hab-raaca qodobada looga hortegaayo ku xad gudubka heshiiska.
- m. Habraaca racfaan qaadashada maxkamadda gaar ah ama maxkamadda sare.
- n. Kaalinta golaha fulinta iyo waaxyaha xisbiyada ku jira isbahaysiga ee dhanka maamulidda arimaha isbahaysiga, oo ay ka mid tahay xiriirkha, farsamada, iyo habraacyada.
- o. Qaabka iyo farsamada ay u qeybsanayaan lacagta sanduuqa xisbiyada xubnaha ka ah isbahaysiga.
- p. Sababaha loo kala diri karo isbahaysiga iyo farsamada iyo hab-raaca loo marayo.

Jadwalka 4aad:

Guddiyada Xallinta Qilaafadka, Anshaxaa Iyo Racfaanka Ee Xisbiga Gudahiisa

1. Qodobbo Guud

Sameynta guddiyada madaxda banaan ee anshaxaa iyo xallinta khilaafaadka xisbiga dhaxdiisa:

- a. Xisbi kasta wuxuu samaynayaa laba guddi oo madax banan oo kala ah guddiga anshaxaa iyo guddiga xalinta khilaafaadka ayadoo loo marayo hab doorasho ah xisbiga gudahiisa.
- b. Haddu sidaas dan u arko Xisbigu wuxuu kala dirayaan guddiga xalinta khilaafaadka iyo anshaxaa.

2. Guddiga Racfaanka.

Dhisida guddiga madaxa banaan ee racfaanka looga qaadanayo go'aamada ay garaan guddiyada madaxa banana ee anshaxa iyo xalinta khilaafaadka gudaha.

- a. Xubnaha guddiga racfaanka waxaa laga dhax dooranaya xubnaha xisbiga ama waxaa magacaabaya guddiga fulinta.
- b. Haddu sidaas dan u arko Xisbigu wuxuu kala diraya guddiga xalinta khilaafaadka iyo anshaxa.

3. Guddiyada Ku Xusan Faq 1-Aad, 2-Aad Waxay Ka Kooban Yihiiin.

- a. Tirada Xubnaha guddiga waa shan ilaa sagaal, kuwaas oo yeelanaya gudoomiye, gudoomiye ku xigayn iyo xoghay.
- b. Guddiga wuxuu iska dhax dooranaya gudoomiye, gudoomiye ku xigayn iyo xoghay.
- c. Xubnaha guddi kasto waa in ay ka muuqataa matalada goballada iyo degmooyinka.
- d. Xubnaha guddiyadu waa inay yihiin jinsi ahaan kuwa isku dhafan isuna dheelitiran.
- e. Xubnaha guddiyadaan kama mid noqon karaan xubnaha golayaasha fulinta ee heer kasta.
- f. Hal xubin oo guddi ka tirsan guddi kale xubin kama noqon karto.
- g. Xubnaha guddiyadaan waa in lagu magacabo si waafaqsan sharuudaha qdobka (2) ee isla jadwalkaan.
- h. Xubnaha guddiyadan waxaay xafiiska haynayaan hal xili oo lix sano ka koobaan oo aan la cusboneyn karin.
- i. Markii dacwadaha anshaxa iyo qilafadka la dhageysanayo haddii ay ka muuqato in xubin ka mid ah xubnaha guddiyadaan dacwada qaadaya uu xiriir ama dan ku leeyahay dacwadaas xubinta waa laga saarayaa guddigaas inta dacwadu socoto.
- j. Gudoomiyaha guddiga dacwada qaadaya marka ay si rasmi usoo gaarto cabasho la xiriirta in xubin ama ka badan ee ka tirsan guddigaas dacwada qaadaya, uu xiriir ama dano ku leeyahay isla dacwadaas la qaadayo, wuxuu ka fariisinaya qaadista dacwadaas.

- k. Dacwadaha, khilaafka, anshaxa iyo racfaanka waa in la dhageystaa go'aanna laga gaaraa mudo 30 maalmood gudahooda oo ka bilaabanayso marka dacwada la keeno.

4. Guddiga Khilaafadka Gudaha: –

Ujeedada laga leeyahay habka loo raacayo anshax marinta waa in la xaqiiyaa: -

- a. In Habraaca loo marayo anshax marinta uu yahay mid dhamaan xubnaha xisbiga ogyihiiin.
- b. In Habraaca loo marayo anshax marinta uu yahay mid ku kor u qaadaya cadaalada iyo sinnaanta.
- c. Xubinta la eedeyay dambi ma leh ilaa dambiga ku cadeyso.
- d. Xubin kasta oo la soo eedeyay wuxuu xaq u leeyahay /xaq u leedahay inay is difaacdo ama qabsato qareen difaaca.
- e. Xubin kasta oo la xukumo waxay qaadan kartaa racfaan.

5. Howsha Guddiga Anshax Gudaha.

- a. In aay go'aan ka gaaraan eedeynta ashax daro, xad gudub ku saabsan dastuurka xisbiga, hab-raaca howl fulinta, wax u dhimid ama ka hor imaansho siyasadda xisbiga.
- b. In aay go'aan ka gaaraan eedeynta la xariirta si xun u isticmaalka daqliga xisbiga.
- c. In aay go'aan ka gaaraan eedeynta anshaxa daro ee la xariirta ka bixin turjimaad qaldan iyo u hogansanan la'aan shuruucda iyo xeerarka xisbiga.
- d. Haddii ay timaado hanjabaad ku wajahan xubin ama xubno katirsan xisbiga ama xisbi kale, guddigu waa inuu ciidamada amniga qoraal ku wargeliyaa.

6. Xeer Hoosadka Guddiga Anshax Ee Xisbiga Gudahiisa.

- a. Xisbigu wuxuu samaynayaa xafiis u qaabilsan uruurinta cabashooyinka
- b. Xubnaha galaya xillinta khilaafaadkaas, haddii ay ka muuqato inay dano ku leeyihiiin dacwadaas la hor keenay, waxaa waajib ku ah in ay sheegaan.
- c. Cabashada waa in guddiga lagu gaarsiiyaa mudo 30 maalmood gudahooda.
- d. Cabasho soo jeediyyayaashu waxay noqon karaan xubno xisbi iyo /ama howlwadeenno xisbi.

- e. Xubnaha qaadaya dacwada waa inay noqdaan kuwa dhowrsoon, asluub iyo anshax wanaagsan, ayna hagayan sharcigan iyo shareecada islaamka.
- f. Qaabka dacwaddu u dhacayso waa: -
 - i. Guddigu wuxuu dhagaysanaya dacwadda.
 - ii. Xoghayaha guddiga wuxuu qaadayaa qoraalka dacwadaas.
 - iii. Dacwad qoraalkaas waa in uu u diyaariyaa si faahfaahsan isagoo tilmaamaya eedeymaha lasoo jeediyay iyo sababaha la xiriira.
 - iv. Xoghayaha waa in qoraalka ku muujiyaa dambiga la sheegay in la galay, iyo qodobada dastuurka, xeerarka, xeer hoosaadyada iyo hab dhaqan wanaagga la jabiay.
 - v. Ka hor intaan dhagaysiga dacwada bilaabmin, muddo shan maalmood gudahood ama ka yar haddii arrintu deg deg tahay, waa in qareenka ama eedeysanaha lagu siiyaa qaab qoral iyo codba ah eedeymaha lagu haysto, islamarkaana laga saxiixaa.
- g. Guddigu markuu helo dhammaan qoraalaada iyo xogta dacwada wuxuu muddo kooban oo aan ka badnayn labo todobaad isugu yeeraa dhamaan cidii ay dacwaddu qusaaysay si loo dhagaysto dacwadaas.
- h. Haddii loo baahdo, guddigu waa inuu goobta dacwada lagu qaadayo keenaa xeel-dheerayaal taqasus u leh afka calaamadaha dadka aan wax maqlin iyo kuwa uu hadalka ku adag yahay.
- i. Shaqsiyadka soo socda waa inay joogaan, waxayna ku biiran karaan wixii lagama maarmaan ah, xilliga dhageysiga anshaxa.
 - i. Xubna ka mid ah guddiga
 - ii. Dacwad qabaha.
 - iii. La dacweeyaha
 - iv. Qareenka, turjumaha, xeel-dheere taqasus u leh midaarka (sign language) dadka maqalkoodu dhiman yahay haddii ay jiraan
 - v. Ugu badnaan shan markhaati dhinac kasta.
- j. Guddomiyaha gudiga anshaxu waa inuu hubiyaa:

- i. Dhageysiga anshax-darrada in aay si caddaalad ah u dhacday.
 - ii. Gudoomiyaha guddiga anshaxu waa inuu hubiyaa habsami u dhicidda dacwadda, waana inuu go'aan xukun ka soo saaraa dacwadaha horyaalla.
 - iii. Waa inuu hubiyo in eedeysanaha la ogeysiyay eedda loo heysto iyo in la wadiiyay inuu qirto ama diido.
 - iv. Dacwad qabahu wuxuu faahfaahinaya xad gudbka loo geystay, wuxuuna u yeeran karaa markhaatiyo, iyo qoraallo, iyo caddaymo kasta oo la xiriira dacwadiisa.
 - v. Eedeysanahu wuxuu u yeeranayaa qareen difaaca wuxuuna su'aalo waydiin karaa markhaatiyada goobta la keenay, wuxuuna keeni karaa qoraallo iyo caddaymo kasta oo la xiriira dacwadda loo haysto.
 - vi. Wuxuu hubinayaa in qoraallada dacwadda xoghayahu si fican loo qaado una kaydiyo.
 - vii. Kulanka guddigu wuxuu ku guntamayaa aqlabiyyad hal dheeri xubnaha guddiga.
 - viii. Go'aannada waxaa lagu garayaa is af garad (consensus). Hadday suurta geliwaydo is afgarshadu, waxaa lagu kala baxayaa cod aqlabiyyad hal dheeri ah. Hadday dhacdo in codku sinmo, gudoomiyaha ayaa codeynaya.
- k. Markii ay dhammaato dhageysiga dacwaddu, guddigu wuxuu gelayaan kulan gaar ah wuxuuna ka wada hadlayaa aadna u falanqeynayaa dacwadii uu dhegeystey, wuxuuna ka soo saarayaa go'aan noqon kara: -
- i. In la waayay caddaymo ku filan oo la xiriira eedaha lasoo jeediyay.
 - ii. Ganaax lacageed ama shaqo lacag la aan ah oo uu ka qabto/ ka qabato xisbiga gudihiisa.
 - iii. Laalid xubin nimadiisa/xubinnimadeeda xisbiga.
 - iv. Ka saarid xisbiga.
 - v. Eedeysanaha waxaa la ogeysinayaa xukunka iyo ciqaabta guddiga anshaxa iyo sababaha keenay waxaana la ogeysinayaa xaqa uu u leyahay inuu racfaan qato.

vi. Xukunka guddiga anshaxa waxaa loo aqrinayaad dhinacyada

7. Dhisidda Guddiga Racfaanka Xisbiga Gudihiisa.

Ujeedada Dhageeysiga rafcaanka anshaxa waxaa lagu xaqqiinayaad:

- i. In uu jiro habraac caadi ah oo aay ogiyihin dhammaan xubnaha xisbigu.
- ii. In lagu dhiirri geliyo cadalada iyo sinaanta.
- iii. Xubinta waxaa loo arkayaa mid aan danbi gelin ilaa inta laga caddaynayo inuu/inay danbiigaas galay.
- iv. Xubinta in fursad loo siiyay inuu is-difaaco/ay is-difaacdo.
- v. Qofka racfaanka soo qaataay in loo sheego xukunka guddiga anshaxa, in guddiga racfaanka ku raacay iyo inuu xukunkii hore ama ciqaabihii hore wax ka badalay.
- vi. Dacwad qabaha iyo eedeysanuhu waxay xaq u leeyihin in aay racfaan ka qataan go'aanka guddiga racfaan una gudbiyaan maxkamada gaarka ah khilafaadka xisbiyada ama maxkamadda sare.

8. Guddiga Xallinta Khilaafaadka Xisbiga Gudihiisa.

Ujeedada habka xallinta khilaafadka waa in lagu xaqqiijiyo:

- i. In uu jiro habraac caadi ah oo aay ogiyihin dhammaan xubnaha xisbigu.
- ii. In lagu dhiirri geliyo cadaladda iyo sinaanta.
- iii. Inay xubantu xaq u leedahay inay is-difaacdo.
- iv. Inay xubantu xaq u leedahay inay racfaan qaadan karto

9. Waajibaadka Guddiga Xallinta Khilafadka Xisbiga Gudihiisa.

- a. Guddiga xallinta khilaafaadka Waxaay dhiira galinaysaa wada jirka iyo midnimada xubnaha xisbiga dhexdiisa.
- b. Guddiga xallinta khilaafaadka waxaay go'aan ka gaareysaa: -
 - i. Khilaafaadka u dhaxeeya xubnaha xisbiga.
 - ii. Khilaafadka u dhaxeeyo xubnaha iyo xisbigooda.
 - iii. Murunka ka dhasha magacaabidda murashaxiinta dorashada ka hor.

- iv. Muranka ka dhasha doorashada ama magaacobista hawladeenada xafiisyadda xisbiga.
- v. Muranka ka dhasha qeybsiga xilalka la'isu magacaabo doorashada kadib.
- vi. Muranka ka dhasha maamulidda maaliyadda iyo hantida kale ee xisbiga.
- vii. Murunka ka dhasha maamulidda arrimaha xisbiga

10. Xeer Hoosadka Guddiga Xallinta Khilaafka Gudaha: -

- a. Khilaafadka ka dhasha magacabista musharixiinta doorashooyinka waa in la soo gudbiyaa afar iyo labatan sac kadib markii la shaaciay musharixiinata.
- b. Wixii kale ee qilaaf ah oo aan ka aheen magacaabista musharixiinta doorashooyinka waa in la diiwaangaliyaa sodan maalmood gudahood.
- c. Waxaa khasab ah in cabashadu: -
 - i. Ay ahato mid qoraal ah ama oraah marqaati fur ah oo uu diiwaangeliyaa xoghayuhu.
 - ii. Waa in aay cad yihiin sababaha khilaafku oo ay u qoran yihiin si faahfahsan oo la fahmi karo.
 - iii. In aay cadeysaa khilaafka, qdobada dastuurka, shuruucda, xeer hoosaadyada iyo hab dhaqanka la khilaafay.
 - iv. Marka cabashadu la xiriirto musharixiinta doorashoyinka, I la eedeyaha waa in lagu gaarsiyyaa cabashadaas afar iyo labatan sacadood gudahood, cabasho kasta ee taa ka duwan la eedeyaha waxaa lagu gaarsiinaya sodon maalmood gudahood.
 - v. Waa inuu saxiixo dacwad qabuhu.
- d. Guddiga xallinta khilaafaadka guduuhu waxay u yerayaan dhinacyada khilaafku dhaxyallo waqtii munaasab ah oo aan ka badnayn afar iyo tobii maalmood gudahood, waxayna ogeysineyaan in aay xaq u leeyihiin inay qabsan karaan qareen u dooda ama xubno xisbiga ka tirsan oo matali kara una doodi kara. Sidoo kale waxay keeni karaan markhaatiyal.
- e. Haddii loo baahdo guddiga xallinta khilaafaadka guduuhu wuxuu keeneyaa turjubaanno, xeel-dheerayaal taqasus u leh afka calaamadaha dadka aan wax maqlin iyo kuwa uu hadalka ku adag yahay.

- f. Shaqsiyaadkaan soo socodo waa in aay jogaan goobta dacwad qadista:-
- i. Xubnaha guddiga dacwada qaadaya
 - ii. Dacwad qabaha.
 - iii. Eedeysanaha;
 - iv. Turjubaanno, xeel-dheerayaal taqasus u leh afka calaamadaha dadka aan wax maqlin iyo kuwa uu ku adag yahay haddii loo baahdo.
 - v. Markhaatiyaal.
- g. Gudoomiyaha guddiga xallinta khilaadaaka waa in uu hubiyaa: -
- i. In qaabka dacwad qaadistu noqoto mid cadaalad ku salaysan.
 - ii. In uu go'aan ka gaaro arrin kasta oo dacwada lagu soo qaaday.
 - iii. In uu hubiyo in eedeysanaha la gaarsiiyay dacwada laga keenay.
 - iv. In dacwad qabahu uu faahfaahiyo eedeymaha uu soo jeedinayo, uuna keeno cadeymo iyo markhaatiyaal.
 - v. Eedeysanaha wuxuu keenayaa qareen u dooda, kaas oo su'aalo weydiin kara markhaatiyaasha goobta la keenay wuxuuna soo bandhigi kara xog uu ku burinayo dacwadda.
 - vi. In uu hubiyo in xoghayuhu wada qoray, diiwangeliyay, keydiyayna dhamaan xogtii dacwaddaas la dhageytay.
- h. Guntanka wuxuu noqonayaa aqlabiyyadda xubnaha oo hal-dheeri ah. (50%+1)
- i. Go'aannada waxaa lagu garayaa is af garad (consensus). Hadday suurta gелиwaydo is afgarshadu, waxaa lagu kala baxayaa cod aqlabiyyad hal dheeri ah. Hadday dhacdo in codku sinmo, gudoomiyaha ayaa codeynaya
 - j. Markii uu dhamaado dhageysigaa xallinta khilaafadka gudomiyaha guddiga xallinta khilaafaadka wuxu hubinaya:
- i. In Xubnaha guddigu ay dhageystaan ayna tixgaliyaan arrimaha lagu soo qaaday dacwadda, markaasna go'aan xaqiiqada ku dhisan ka gaaraya ama tala bixin ka soo jeedinaya.
 - ii. In eedeysanaha la ogeysinayo xukunka iyo amaradda guddiga oo sababaysan, sidoo kale waxaa la ogeysinayaa in uu xaq u leyahay inuu ka qaadan karo racfaan.

iii. In Xukunka iyo amarrada loo aqrinayay dhinacyada.

11. Guddiga Racfaanka Xallinta Khilaafadka Gudaha

Ujeedada guddigu waa in uu hubiyaa: -

- a. Inuu jiro Habraac toosan oo aay ogyihii dhammaan xubnaha xisbigu.
- b. Inuu hubiyo cadaladda iyo sinanta.
- c. In xubinta xaq u leyahay/leedahay is difaacid

12. Waajibaadka Guddiga Racfaanka Xallinta Khilaafadka Gudaha Waa:

- a. Waxay hormarinayaan isku duubnaanta iyo isku xirnaanta xubnaha xisbiga.
- b. Waxay go'aaminayaan racfaanka go'aanka guddiga khilaafaadka laga soo qaatay.

13. Hab-Raaca Racfaanka.

- a. Racfaan waxaa keeni karaa: -
 - i. Eedeysane ay go'aan ka gaartay ama ay xukuntay guddiga xallinta khilaafaadka gudaha.
 - ii. Dacwad qabe, cabasho u geeyay guddiga xallinta khilaafaadka gudaha.
- b. Dhageysiga racfaanka waxaa qaadaya guddiga racfaanka.
- c. Guddiga racfaanku waa mesha ugu danbeysa oo loo qaadan karo racfaan xisbiga guduhiisa.

14. Xeerarka Qaadista Racfaanka: -

- a. Xisbigu waa inuu sameeyaa xafiis loogu talagalay qabashada dacwadaha racfaanka laga qaatay.
- b. Racfanka waa in la geyaa guddiga racfaanka.
- c. Racfaanka waa in: -
 - i. Lagu qaataa afar iyo tobant maalmood gudahood kana bilaabmaysa markii lagu wargeliyay go'aanka xukunka.
 - ii. Waa in uu noqdaa orah ama qoraal uu diyaariyay xoghayuhu.
 - iii. Waa in la cadeyaa sababo faahfaahsan oo run ku salaysan

- iv. In loo gudbiyaa eedeysanaha afar iyo toban maalmood gudahood ka hor dhageysiga racfaanka ama waqtii intaa yar haddii arrintu deg deg tahay.
- d. Markii laga reebo xaalado khaas ah oo uu go'aamiyay gudoomiyaha guddiga racfaanka ee dhageysanaya racfaankaas, xog cusub lama soo bandhigi karo lamana tixgelinkaro marka dib loo dhageysanayo racfaankaas.
- e. Eedeymo cusub lama keeni karo waqtiga racfaanka.
- f. Guddomiyaha iyo xubnaha guddiga rafcaanka waa in aay tixgaliyaan arimaha lagu soo qaaday dhageysiga racfaankan, waana in aay go'aan ka garaan ayagoo ku salaynaya xogaha iyo caddeymaha loo soo gudbiyay dhageysiga racfaankan, kaas oo noqon kara mid waafaqsan ama ka duwan go'aankii hore.
- g. Qofka racfaanka soo qaatay in loo sheego xukunka guddiga racfaanka, in guddiga racfaanka ku raacay iyo inuu xukunkii hore ama ciqaabihii hore wax ka badalay (8) Dacwad qabaha iyo eedeysanuhu waxay xaq u leeyihin in aay racfaan ka qataan go'aanka guddiga racfaanka una gudbiyaan maxkamadda gaarka ah ee khilafaadka xisbiyada ama maxkamadda sare

Tusmo

Qodobka 1aad: Fasiraad Qaar Ka Mid Ah Ereyada Sharcigan Ku Jira.....	1
Qodobka 2aad: Xisbi Siyaasadeed	1
Qodobka 3aad: Xaqa ka-Qeyb-Galka Siyaasadda	2
Qodobka 4aad: Diiwaan-Gilinta Ku- Meel- Gaarka ah	2
Qodobka 5aad: Maxaa Lagu Soo Qorayaan Codsiga Diiwaangelinta.	3
Qodobka 6aad: Diiwaangelinta Rasmiga Ah.	3
Qodobka 7aad: Diidmo Diiwaangelin.	4
Qodobka 8aad: Shuruucda Iyo Xeerarka Xisbiga.	5
Qodobka 9aad: ISBAHEYSI XISBIYO.	5
Qodobka 10aad: Isku Biirid Xisbiyo Siyaasadeed.	5
Qodobka 11aad: Xubnaha Ka Reeban Ka Mid Noqoshada Xisbiyada Siyaasadda.....	6
Qodobka 12aad: Iska Casilid Xubinnimada Xisbi Siyaasadeed	6
Qodobka 13aad: Xuquuqda Iyo Mudnaanta Xisbiyada Siyaasadeed.	7
Qodobka 14aad: Maqaam Sharciyeed (Shaqsiyad Qaanuuneydka Xisbi) Iyo Cadeynta Hantidiisa	8
Qodobka 15aad: Keydinta Xogta Xisbiga.....	8
Qodobka 16aad: Waajibaadka Xisbiga Ee Wargelinta Diiwaangeliyaha.....	9
Qodobka 17aad: Kulamada Xisbigu U Qabanayo Dadweynaha.....	10
Qodobka 18aad: Wargelin Waxka-Beddelid.	10
Qodobka 19aad: Diiwaan Ka Saaridda Xisbiga.....	10
Qodobka 20aad: Saameynta Ay Yeelanayso Ka Saarista Diiwaanka.....	11
Qodobka 21aad: SANDUUQA XISBIYADA.	12
Qodobka 22aad: Ilaha Sanduuqa Xisbiyada.....	12
Qodobka 23aad: Qeybinta Lacagaha Sanduuqa.	12
Qodobka 24aad: Ujeeddada Sanduuqa Xisbiyada.....	13
Qodobka 25aad: Ilaha Kale Ee Dhaqaalaha Xisbiga Ama Dhigaal Bileed Xubnaha Xisbiga	14
Qodobka 26aad: Xadgudyada La Xiriira Ilaha Dhaqaalaha Xisbigu Ka Helo.	14
Qodobka 27aad: Faafinta Ilaha Dhaqaale Ee Xisbiga.....	15
Qodobka 28aad: Xogta Laga Rabo Xisbiga Doorashada Ka Hor.	15
Qodobka 29aad: Hantidhowridda Xisaabaadka Xisbiga.....	16
Qodobka 30aad: Hawlaha Diiwaangeliyaha.....	16
Qodobka 31aad: Dhismaha Guddiga Isku Xirkha Xisbiyada Diiwaan Gashan.....	17
Qodobka 32aad: Dhamaynta Khilaafaadka Xisbiyada.	17
Qodobka 33aad: Go'aan Gaarista Maxkamadda.....	17

Qodobka 34aad: XADGUDUBYO	17
Qodobka 35aad: Kala Diridda Xisbi Siyaasadeed.....	18
Qodobka 36aad: Xeerarka Habsami U Socodsiinta Qodobada Sharcigan.	19
Qodobka 37aad: Qodobbadda Kala-Guurka.	19
Qodobka 38aad: Dhaqangalka Sharciga	20
Jadwalka 1AAD:Hab dhaqanka Xisbiyada Siyaasadda.....	20
Jadwalka 2aad: Qeybaha Uu Ka Kooban Yahay Dastuurka Iyo Xeerarka Xisbiga Siyaasadeed	23
Jadwalka 3aad: Shuruudaha Asaasiga Ah Ee Heshiishyada Isbahaysiga.....	26
Jadwalka 4aad: Guddiyada Xallinta Qilaafadka, Anshaxa Iyo Racfaanka Ee Xisbiga Gudahiisa	27